Hagaha Maalmaha Hore

Ee Dhawaan-soo-Galaha

Settlement.Org
Welcome to Ontario

Waxa si hagar la'aan ah u gargaaray:

Citizenship and Immigration Canada
Citoyenneté et Immigration Canada
Ontario

© Ontario Council of Agencies Serving Immigrants 2008

First Days Guide - Somali

TUSMADA SHABAKADDA

Hordhac 1
Imaatinka Ontaariyo 3
Guri Degid 6
Caafimaadka..... 11
Shaqo 16
Waxbarashada 20
Qaxootiga iyo Muwaadinimada 22
Adeegyada Sharciga 24
Bulshada iyo Maddadaaladaa 26
Macluumaadka Macaamiisha 28
Tallaabooyinka xiga 36

KU SOO DHAWOOW ONTAARIYO

Aad bay u adag tahay inaad waddan cusub tagto. Way dhibaato badan tahay in ka tagto sabiibadaa iyo qoyskaaga. Waxaa jira waxyaalo badan oo ka duwan kuwii waddanka aad ka timid. Dugsiga, caafimaadka, shaqooyinka iyo sharciguba waxa laga yaabaa inay kuula muuqdaan wax silloon iyadoo haddana ay ku xidhan tahay xaggaad (waddanka) ad ka timi. Sidaad Ontaariyo ula qabsataa waxay qaadan kartaa waqti dheer, gaar ahaan haddaanad haysan macluumaadka saxda ah, amaba aanad garanayn waxaad samaysid.

Maalmaha Hore waxaa wax ka qoray shaqaalaha shabakadda Internetka ee Settlement.org oo ah shabakad ay dadka cusub ugu tala galeen kuwa maalin walba gargaara degitaanka dadka cusub. Boggan wuxuu ka jawaabaa su'aalaha muhiimka ah ee ay wayddiiyaan dadka cusubi waxaanu ka caawiyaa sidii ay u qaadi lahaayeen tallaabooyinka ka dhigaaya Ontaariyo gurigooda cusub.

Maalmaha Hore wuxu kuu sheegayaa waxyaabha aad u baahan tahay inaad ogaato labadaada usbuuc ee Ontaariyo ugu horreeya. Kama jawaabi doono boggani dhamaan su'aalahahaaga khuseeya nolosha Ontaariyo. Wuxuu kaa caawin doonaa waxyaalaha bilowga ah. Waxaase jira meelo badan oo kale oo aad ka helaysid war bixinta aad rabto waxaanaan kuu sheegi doonaa meelahaas goor dhow. Haddii ad heli karto Kombuutarka iyo shabakadda waxad eegtaa shabakadda www.settlement.org. kana raadi wixii war dheeraad ah ee ku saabsan macluumaadka aad buuggan ka ahrido ama su'aala kale ee ad qabi karto.

Buuggan waxaa ku qoran war badan, lagana yaabee inay kugu adkaato halkii ad ka bilaabi lahayd. Wakhtigaaga qaado si deggana u akhri, si aad u hubiso inaad taqaano walxaha muhiimka kuu ah iyo sida loogu hawl galo.

Dad baa saaxiibbo halkan hore ugu lahaa kuwaas oo ka caawin kara hawlaha muhiimka ah iyo inay u sharxaan siday u kala socdaan hawlaha Kanada. Xaqiiqdii tani waa caawimo buuxda, laakiin siday doontaba ha ahaatee, adigu hubi inaad akhrido buuggan si aad u ogaato dhammaan walxaha muhiimka ah.

Waxa suuragal ah in aanad ku lahayn saaxiib kugu sugaaya sidaa awgeed waxaa jira waxyaalo badan oo aad u baahan tahay inaad adigu qabsato. Waxaana jira waxyaalo badan oo ku caawin doona oo ad dhamaysan karto inta aanad Ontaariyo iman ka hor.

Usbuucyadaada ugu horreeya ee Kanada, hawl badan baa kuu taalla. Waxaad u baahan tahay inaad buuxiso foomam badan oo dawladdu leeday. Foomamkaasi waxay kaa caawin doonaan waxyaalo badan oo aanad magacyadooda fahmi karin sida magacyadan la soo gaabiyay SIN,OHIP,CCTB iwm. Foomamkaas wax lacag ah ha ku buuxin. Inta badan, waxaad lacag la'aan kaga soo guurin kartaa bogga shabakadda. Buuxintoodana uma baahnid inad lacag ku bixiso maxaa yeelay waxa kaa caawinaaya xafiiska dejinta. Sida loola xafiisyadaa loola xiriirana waxaad ka raadisaa buuggan.

Sida bogga shabakadda settlement.org oo kale, ayaa buuggana loo habeeyay mawduucyo Waxaad ka heli doontaa tax macluumaad ah oo ka kooban waxyaalaha aad u baahan tahay inaad samayso usbuucyadaada ugu horreeya Ontaariyo. Qaybaha buuggani waxay si faahfaahsan u sharaxayaan waxyaabahaas. Qayb waliba waxay ku siin doontaa macluumaad faahfaahsan. Waxaa jira meelo kugu xiraya shabakaadda oo ad ka helayso warbixinn dhaadheer iyo macluumaad ku saabsan halka ad gargaar ka heli karto. Foomamka muhiimka ah waxaad ka soo guurin kartaa ama ka daabacan kartaa bogga shabakadda.

WAXYAABAHA AAD SAMAYNAYSO USBUUCYADAADA U HOREEYA

Adaa go'aansan Kara waxaad samaynayso marka ugu horraysa, laakiin haddii aanad carruur lahayn uma baahnid inaad qabato waxyaalo badan, sida inaad raadiso dugsi gurigaaga u dhaw. Waxaa jira qaar kale oo ay lagam maarmaan tahay inad isla markaad timaaddo ad samayso sida inad codsato warqadda caafimaadka (OHIP) iyo lambarka Camysika Dadwaynaha (SIN).

Waxa laga yaabaa inad ehel ama saaxiibbo ku leedahay magaalada aad doonayso inaad ku noolaato. Waanay ku caawin doonaan kuna tusi doonaan halka wax walba laga helo magaalada iyo inaad hesho meel aad degto. Waxa kale oo ay kaa caawin doonaan inaad barato bulshadaada cusub.

- Meel ad degto raadi
- Dalbo lambarka caymiska ee bulsho (SIN)
- Dalbo kaar caafimaadka (OHIP)
- Dalbo lacagta gargaarka korinta carruurta.
- Bangiga xisaasb ka furo.
- Sida shaqa loo helo macluumaadkeeda ogow.
- Raadi xafiiska dejinta ee gurigaaga ugu dhaw.
- Raadi xarunta caafimaadka bulshada ee gurigaaga ugu dhaw.
- Raadi xafiiska ilaha shaqada ee gurigaaga ugu dhaw.
- Raadi maktabada gurgaaga ugu dhaw.
- Raadi xaqaa ad leedahay shaqaale ahaan iyo markaad guri kiraysatab.
- Ogow sida caruurtaada dugsiga loogu daro.
- Raadi qariiradaha jidadka barana dariiqyada gaadiidka dadwaynaha.
- U raadi fasal luqada ingiriisiga ah naftaada iyo reerkaagaba.
- Raadi halka wax laga iibsado.
- Macluumaad dheeraad ah ka raadi www.settlement.org.

QIIMAHA KANADA LAGU DEGAA WAA IMISA?

Qiimaha ad ku fekerayso inay ka badan tahay baa laga yaabba. Laanta socdaalka iyo muwaadinmadu waxay ku wayddiinayaan inaad tusto caddayn lacag dhigaal ah oo bangi kuu taalla wayo waxay doonayaan inaad u caddayso inaad haysato lacag ku filan adiga iyo reerkaagaba si aad u debberto noloshooda markaad Kanada timaado.

Laakiin cadadka lacagta ay doonayaan inaad haysato waxa laga yaabaa in aanay nolol kuugu fillaanin sida ay kuugu fillayd markaad joogtay waddankaaga. Qaar badan oo dadka cusub ahi ma helaan shaqooyin muddo dhawr bilood ah. Waqti badan ayayna kugu qaadan doontaa inaad halkan ka samaysato noloshaada cusub sida aad u rabto.

Markaad hesho guri, waa inaad bixiso kirada bisha ugu horreysa iyo tan ugu danbaysa ka hor inta aanad u guurin. Guryaha dabaqa ah qaar bay alaabadu (sariiri iyo fadhigii iwm) taallaa laakiin badan koodu alaabo ma leh. Sidaas darteed waa inaad soo iibsato saabaanka (alaabada) gurigaaga. Waa inaad soo iibsato dharka qabowga. Waa inaad iska bixiso baabuur raacaaga, tilifoonka, cuntada, daawooyinka, maaweelada. tirada waxyaalaha aad iska bixinaysaa way dheertahay.

Qiimaha noloshu isku mid maaha magaalooyinka oo dhan, tusaale ahaan, si aad u ogaato qiime intee le'eg ayaa Kanada lagu noolaan karaa, akhri maqaalkan, qiime intee le'eg ayuu reer saddex (qof) ahi ku noolaan karaa Kanada? Adoo isticmaalaaya halkan - **www.settlement.org/FD/01**.

Waa inaad soo ogaataa qiimaha ay kugu gaarayso in aad ku noolaato magaalada aad rabto inaad degto. Soo qaado lacag inta aad awooddo si ay wax waliba kuugu fududaadaan inta aad ku jirto bilahaaga ugu horreeya.

IMAASHAHA ONTAARIYO

Markaad soo gudbayso laanta canshuuraha iyo socdaalka, wayddii sarkaalka Kanada u dhashay ee laanta socdaalka wixii ad su'aalo qabto ee ku saabsan socdaalkaaga ama xaaladda dal ku galkaaga (fiisahaaga). Haddaad su'aalahaas wayddiintooda dib u dhigato, waxa suurowda inad inaay adkaato helitaanka jawaabta ad doonayso.

Haddii aad buuggan akhriyayso inta aanad Kanada iman ka hor, akhri qodobka **waraaqo (dukumenti) noocee ah ayaan soo qaataa markaan ka soo degaayo KANADA anoo qaxooti cusub ah?** - **www.settlement.org/FD/02**.

Haddaad ka soo degto Garoonka Caalamiga ah ee Lester B. Pearson kuna yaalla Toronto, xafiiska soo dhawaynta qaxootiga iyo adeegga macluumaadka (IRIS) ayaa kuu haya warbixin ku caawin doonta. Wuxuu kuu shegi doonaa waxaad u baahantay inaad samayso marka ugu horraysa ee aad Ontaariyo timaado, iyo meesha laga helo wakaaladaha caawiya qaxootiga cusub.

Shaqaalaha garoonka dayaaradahu way kuu sheegi karaan habka ugu wanaagsan ee aad ku tegi karto halka aad qorshaysatay inad degto. Garoonka diyaaraduhu waxa jooga basas, tagaasi iyo gaadiid kale oo ku gayn kara halka aad doonayso inaad tagto. Gaadiidkaasi way kala qaalisan yihiin iyadoo ku xiran meesha ad tegayso markaa qiimaha ka ogoow shaqaalaha garoonka diyaaradaha ama xafiiska adeegga gaadiidka inta aanad dooran nooca gaadiidka ad raacayso.

BARASHADA MAGAALADAADA CUSUB

Waxyaalo fara badan baad qaban doontaa marka ugu horreeysa ee aad timaado. Waxaadna u baahan tahay inaad qayb wakhtigaaga ka mid ah u isticmaasho si aad u barato magaaladaada cusub. Sida ugu fiican ee aad magaalada ku kala baran kartaana waa adigoo dhex socsocda magaalada sidii waxad dalxiisayso.

Ka hor inta aanad iman, raadi macluumaadka dalxiiska ee magaalada aad qorshaynayso inaad degto. Markaad timaado, ayaamo u hur daawashada magaalada adoo tagsi raacaaya ama bas, tanina waxay kaa caawinaysaa waxyaalo badan sida soo sahaminta gurigaaga cusub:

- Raadi halka ay ku yaallaan dukaamadu
- Raadi habka ugu wanaagsan ee aad ku tagi karto halka aad rabto
- Ogow shaqada ad doonayso nooceeda iyo meelaha laga heli karo

Arrintani waxay kaa caawinaysa inad nasato oo ad ka soo kabato safarkiii inta aanad bilaabin hawlaha degitaanka.

ARRIMAHA ONTAARIYO

Cimilada

Ontaariyo waa gobol wayn, heer kulkuna waa isbeddelaa degmo ilaa degmo. Heerkulku wuu kala duwanaan karaa isla gobolka gudihiisa. Inta badanna bisha Janaayo waa bisha ugu qabow sanadka Luuliyana waa tan ugu kulul. Idaacadaha iyo tilefiishanada ayaa laga sheegaa heerkulka waxana lagu cabbiraa heerkulbeegga sentigarayd (C), ayagoo inta badanna sheega heerkulbeega (F).

Sanadku wuxuu ka kooban yahay afar xili:

JIILAAL – 21 DIISEENBAR ILAA 19 MAARSO

Jiilaalka, heer kulku waa qabow. Inta badana baraf baa da'a. Inta lagu jiro bilaha qabowga (Diiseembar, Janaayo iyo febraayo) dalka badankiisa heerkulku wuxuu ka hooseeyaa 0ºC, habeen iyo maalinba. Qaybo ka mida gobolka wuxuu heerkulku ka hoos mari karaa 25ºC. gobolaka

Ontaariyo badan, dhulku waxa saaran baraf marka laga soo bilaabo bartamaha Diiseembar ilaa bartamaha Maarso. Marka aad dhinaca waqooyiga ku sii dhawaataba, qabowga ayaa sii kordha. **www.settlement.org/FD/24**

GU- 20 MAARSO ILAA 20 JUUN

Gugu waa xilli roobaad meelo badan oo Ontaariyo ka mida. Heerkulku maalintu wuu kordhaa xilligan dhammaantiiba, laakiin habeenkii waa qabow. Celceliska heerkulka maalintii waa 12ºC inta lagu jiro bilaha Maarso, Abriil iyo horraanta Maajo.

XAGAA- 21 JUUN ILAA 21 SIBTEMBAR

Xagaagu wuxuu bilowdaa 21 ka Juun, laakiin dadyoowga Ontaariyo waxay aad u dareemaan xagaaga bilaha luuliyo iyo Ogosto waana bilaha xagaaga badankiisaba ah. Dalka badankiisa cimiladu aad bay u diirran tahay. Koonfurta Ontaariyo, heerkulka maalintii wuu ka sareeyaa 20ºC waxaanuu kor u dhaafa in ka saraysa 30ºC. Kulaylka iyo huurkuba aad by u badnaan karran xilligia xagaaga. Idaacada iyo Tilifiishaka waxaad ka maqli doontaa digniin ku saabsan caafimaad darrada u sababo kulaylku, qorraxdu iyo qiiqu.

DAYR – 22 SIBTEMBAR ILAA 20 DIISEEMBAR

Xilliga dayrtu, wuxuu bilaabmaa Sibtembar. Cimiladu waa qaboow dhir badanna waxa is beddela midabka caleenta waxanay ku soo daadataa dhulka. Roob badanina waa di'i karaa sanadka xilligan oo kale. Meelo badan oo waqooyiga Ontaariyo ka mida baraf baa ka bilowda isagoo da'a ilaa damayaaqada Octoobar. Gobolka badankiisa, celceliska heerkulka maalintii waa 10ºC - 12ºC, waanuu yaraadaa maadaama uu Jiilaalkii soo cago cagaynaayo. Bilaha Dayrtu waa Sibtembar, Oktoobar iyo Nofembar.

jiilaalka Ontaariyo qabow baraf iyo qabow bdanba wuu lahaan karaa. Haddii aad ka timid dal kulul, Jiilaalka waad ka tacajabi doontaa. Jiilaalku waa waqti wanaagsan marka baraf jiro, laakiin lagam maarmaan in la barto khatarta uu leeyahay iyo sidaad diirranaan lahayd. Waxaa hoos ku qoran dharka jiilaalka ee aad u baahan doonto:

- Kabaha dhaxanta
- Koor (kabbood) adag (lakabyo badan leh) oo dhaxanta celiya
- Marada qoorta ama wajiga lagu wareejiyo
- Gacmo gashi lakabya leh
- Hoos gashi diirran (surwaal luga dheer oo suuf ah oo Soomaalida reer Kanada u yaqaannaan Abu Cumar)
- Koofiyad daboosha dhegaha. Koofiyaddu door wayn bay ka qaadata labbis jiilaalka maxaa yeelay dadku inta badan diirrimaadkoodu wuxu ka baxa madax.

Waxaad ogaan kartaa cimilada magaaladaada haddaad dhagaysto idaacada ama daawato Tilifiishinka amaba akhrisato jaraa'iidka maalin laha ah.

GARGAAR HELID

Xafiiska dejinta

Waxaa jira wakaalado badan kuwaas oo kaa caawin kara inaad ka biloowdo noloshaada Ontaariyo. Waxaa lagu magacaabaa ama dejinta ururrada adeegyada qaxootiga. Waxayna caawiyaan qaxootiga cusub ee Ontaariyo yimaadda.

Isla marka aad timaaddo Ontaariyo, raadi ururka dejinta ee kugu dhaw. Waxay kaa caawinayaan si aad u degto magaaladaada cusub. Waxaa dhici kara inaad degto huteelada la seexdo marka ugu horraysa ee aad timaaddo. Laakiin ururrada dejintu waxay kaa caawin karaan inaad hesho

meeshaa ugu horreysa ee aad ku degayso. Xitaa waxay kaa cawin karaan inaad barato bulshadaada cusub.

Waxa suuragal ah inad maqasho dadka oo xarumahaas ugu yeeraya Wakaaladaha ISAP ama xarumaha dhaqannada isku dhafka ah, amaba wakaaladaha u adeegga qaxootiga. Waxa suurowda in aanad adeegyadan oo kale ku haysan waddankii ad ka timid. Kanada, adeegyada dejintu waa lacag la'aan markastana waa qarsoodi. Hoos waxaa ah qaar adeegyadaas ka mida ah:

- Af celin (turjumaad) iyo waraaqo turjumid
- In lala raadiyo meel la dego, fasallo luqadda ingiriisiga ah, shaqo, barnaamijyo tababar ah iyo meelo raashinka laga iibsado ama alaabta guriga oo qiimo jaban ah
- In laga caawiyo buuxinta foomamka iyo warqadda shaqada
- Iyo macluumaadka ilaha kale ee caawimada bixiya ee bulshada.

Waad raadin kartaa xafiiska dejinta ama adeegyada marka aad u timaado bulshadaada cusub ama waxad geli kartaa shabakadda settlement.org oo ad macluumaad ka raadin karto qaybta "Find Help Close to Home". **www.settlement.org/FD/04**

Xarunta Macluumaadka dadka cusub (NIC)

Hadaad joogto Toronto ama gobolka Peel, marka hore waxad tagtaa xarunta macluumaadka dadka cusub ee (Newcomers Information Centre - NIC). Xaruntaasi waxay war gelin doontaa ururrada kuwaas oo kaa caawin doona inaad degto agagaarka Magaala Waynta Toronto (GTA). NIC da kuugu dhaw ka raadi buugga tilifoonada.

Xarunta Macluumaadka Bulshada

Haddii aad raadinayso macluumaadka beesha, bulshada, caafimaadka ama adeegyada dawladda, waxad la xiriirtaa Xarunta Macluumaadka Bulshada ee xaafaddaada. Waxy kuu heli karaan adeeg lacag la'aan ah oo halkaad deggan tahay u dhaw. Adeegoodu waa lacag la'aan waana qarsoodi. Umana baahnid inaad siiso xog hoos ahaaneed oo adiga kuu gaar ah.

Si aad u hesho xarunta war bixinta bulshada ee kuugu dhaw ka raadi buugga tilifoonada ee midab kiisu yahay buluugga kana raadi magaca "Community Information". Buugga tilifoonada waxa ku qoran tilifoon nambarka iyo cinwaanka jidka ee xarunta. Haddii aanad garanayn sida loo isticmaalo buugga tilifoonada, ka akhri halkan adoo istimaalaaya qaybta tilifoon buugga ee ku jirta qaybta **warka macaamiisha**.

Meelo badan waxaad ka garaaci kartaa 211 tilifoonkaaga si aad u hesho warka bulshada.

LAANTA SOCDAALKA IYO MUWAADINIMADA EE KANADA

Haddii ad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan martabadaada (meesha xaalkaaga qaxootinimo marayo) qaxootinimo ka dib markaad Kanada timaaddo, tilifoon u dir xarunta wicida ee laanta socdaalka iyo muwaadinimda ee Kanada (CIC).

Waxad ka heli kartaa warbixin cajalad lagu duubay, 24 ka saacadood ee maalintii, iyo 7da cisho ee usbuuca.

Laakiin Haddii aad doonayso inaad Qof la hadasho, waxad wacdaa inta u dhaxaysa 8:00 aroornimo iyo 4:00 galabnimo laga bilaabo Isniinta ilaa Jimcaha. Xarunta wicidda waxaa lagala hadli karaa **1-888-242-2100**. Xarunta wicidda waxa lagaga hadlaa luqadaha ingiriisiga iyo faransiiska oo keliya.

GURI DEGID

HELITAANKA MEEL AD KU DEGTO

Hadday suurto gal tahay, inta aanad iman isku day inaad qaban qaabsato halkii aad degi lahayd habeenadaada ugu horreeya ee Ontaariyo. Waxaad la xiriiri kartaa xafiiska socdaalka ee dalkaaga ku yaalla si ay kuugu helaan ama kuugu qoondeeyaan meel aad ku degto magaalada Toronto ama magaalo kale oo ku taalla gobolka Ontaariyo.

Markaad joogto waqooyinga Ameerica, waxaad kala soo hadli kartaa xafiiska dalxiiska ee Ontaariyo 1-800-ONTARIO (**1-800-668-2746**). Xafiiska dalxiiska Ontaariyo wuxu kaa caawin karaan inaad hesho qol ama inay boos hayn kaaga sameeyaan huteelada la seexdo. Hawl qabashaduna waa lacag la'aan.

Waxad u baahan tahay meel aad ku meel gaar u degto inta aad raadinayso meel aad ku noolaato. Waad raadin kartaa huteelada la seexdo ama qol iyo quraac (qol kiro ah oo ay quraacina ku jirto), amaba guryaha ardaydu ka degto jaamacadaha ama kuliyadaha. Waxad degi kartaa goob socdaal ama guri ardayeed muddo ayaamo, usbuucyo, ama bilo ah halkaas oo lacagtu ka jaban tahay tan huteelada la seexdo (albeerkada). Qolka iyo quraacda waa qol ku dhex yaal guri qof halkaas oo kan guriga lehi kuu diyaarinaayo quraacda maalin kasta.

Haddii aad ka soo degto garoonka caalamiga ee Toronto ku yaala magaciisana la yidhaahdo Lester B. Pearson international airport, adiga oon haysan meel aad ku degto, ka raadi xafiiska soo dhawaynta qaxootiga (immigrant reception) iyo adeegyada macluumaadka (information services) IRIS, oo ad ka wacayso tilifoon nambarkan **905-672-3660**. Iyaguba way hayaan macluumaadka huteelada la seexdo (albeerkooyinka) iyo meelaha la dego ee u dhaw garoonka diyaaradaha. Huteelada la seexdo ee u dhaw garoonka diyaaradahu waa qaali markaa isku day inaad hesho huteel kale oo aad ugu dhaw magaalada.

Guryha Ontaariyo badankoodu waa qaali. Gurigaaga ugu horreeyana laga yaabee in aanu noqon kaad rabtay. Waxaad u baahan tahay waqti aad ku fahanto suuqa kirada iyo inaad ogaato xaafadahee ayaad rabtaa inaad ku degto. Isku day in aanad lacagbadan ku bixinin guriga degitaankiisa. Dadka cusub intooda badani ma helaan shaqo muddo bilo ah.

Xeel dheerayaal badan baa yiraahda, haku bixin meel lagu noolaado (guri) wax ka badan saddex daloolow dalool (33.3%) isu geynta dakhligaaga ka hor inta aanad bixin cashuuraha.

KALA DOORASHADA GURYAHA LA DEGO

Haddaad dad kale guri la wadaagto waxa kuu dhigmaysa lacag. Ardayda iyo dhallinyarada ayaa inta badan sidaa sameeya, laakiin dadka waawaynina way samayn karaan si ay lacag u baajiyaan.

Kirada ad bixinaysaa way kala duwan tahay qaybaha magaalada. Sida badan, magaalooyinka waawayn, ijaarku wuxu qaali yahay meelaha u dhaw magaalada hoose.

Su'aalaha ad wayddiinayso intaanad kiraysan ka hor waxa ka mida:

- Gurigu ma dhow yahay basaska iyo tareenka dhulka hoostiisa?
- Maxaa adeegyo kale u dhaw? (Dugsi, dukaano, doobbi lacageed (mashiin lacag lagu rido oo dharka maydha) beeraha raaxada iyo ciyaarta, garoomada ciyaaraha, xarumaha bulshada, goobaha daawaynta, xarumaha caafimaadka iyo masaajiddo)
- Guri deggan oo an qaylo lahayn ma yahay?
- Dadka kirada ugu jira ee kale waa sidee?
- Hadaad gaadhi leedahay, meel la dhigo ma jirtaa?
- Xaafaddu amaan ma tahay?
- Haddaad caruur leedahay, dugsigu ma u dhaw yahay?

- Korantada iyo kululaynta guriga ma lacag dheerad ah baa la bixiyaa?

ILO

Halkan waxa ku qoran ilaha ad ka ogaan karto wixii dheeraad ah ee ku saabsan guryaha adigoo an Ontaariyo iman.

Iibka iyo kirada guryaha: adeegyadaasi waxa kale oo loogu yeerqa Mamulahidda Hantida Kirada ah ama dillaallada guryaha kirada ah, waana shirkado caawiya mulkiilayaasha guryaha si ay ugu helaan kirayste cusub. Waad la xiriiri kartaa si ay kaaga caawiyaan inaad hesho meel aad ku noolaato ayagoo lacagta hawl qabashadana kaa raba.

Wayddii adeegyada ay bixiyaan. Miyay kuu celin doonaan lacagtaada haddii aanad ku faraxsanayn adeegyadooda? Haddii aanay kuu celinayn, **ha bixinin** wax ujuuro adeeg ah hana isticmaalin adeegyadaas.

Geeddiga Kanada: Waa hage ku yaalla shabakadda internetka oo loogu tala galay dadka meel cusub degaya ama u kala guuraya Kanada. Waxad ka baari karta magaalada ad doonayso macluumaadkeeda guryaha, xannaanada carruurta, cimilada, kharashyaada iyo waxyaalo kale oo badan. Waxad xitaa syabaiaddaas ka soo guurin karta diiwaanka tilifoonada - **www.settlement.org/FD/03**.

Diiwaanka huruudda ah ee tilifoonnada: “yellow pages” ku waa qayb buug tilifoon oo ay ku qoran yihiin nambarrada tilifoonnada ganacsiga iyo shirkadaha meherlayda ah oo laysugu xigsiiyay sida xuruufaha magacoodu u kala horreeyaan. Ganacsiyada waxaa loo qaybo siday isugu nooc yihiin ah. Waadna ka dhex raadin kartaa adeegyada kirada diiwaanka tilifoonada goobta shabakadda halkan **www.settlement.org/FD/18**.

Xayaysiis Kooban: in badan jaraa’idada Ontaariyo waxay leeyihiin qayb lagu qoro xayaysiis kooban oo ay mulkiilayaasha guryuhu ku qoraan guryaha bannaan. Mulkiilayaasha guryuu waxay badanaa xayaysiiska guryahooda dhejiyaan bil ka hor inta aan la gelin.

Akhriga xayaaysiisyadaasi waxay kaa caawinaysaa inaad ogaato qiimaha iyo helitaanka guriga aad doonayso. Xayaysiinta guri degista waxaad ka heli kartaa rugta shabakadda ee jaraa’idka oo Ontaariyo ka soo baxa.

Caadiyan waa inaad sugto inta aad ka imanayso, si ad u hesho guri haddaad doonayso inad adigu inaad adigu u tago mulkiilaha guriga. Waad soo wici kartaa mulkiilaha ka hor inta aanad iman Ontaariyo, Laakiin ha rajayn inaad hesho guri laguu sii diyaariyay. Inta badan mulkiilayaasha guryuhu waxay rabaan inay qof ahaan kuula kulmaan inta aanay kaa kirayn guri.

Ururrada dejinta

Kaddib markaad timaado Ontaariyo, waad la xiriiri kartaa wakaaladda dejinta ee beeshada cusub. Waxay siiyaan dadka cusub adeegyo badan. Waxayna kaa caawin karaan inaad hesho guri aad degto, shaqo, iyo adeegyo kale ama waxay ku siinayaan macluumaad kaa caawiya inaad dhex degto bulshadaada cusub.

Dadka qaar baa xarumahaas ku magacaaba Ururrada (ISAP Agencies), xarumaha dhaqammada dhafan ama xarumaha u adeegidda qaxootiga. Dhammaan magacyadaasi waa isku mid. Qaxootiga cusub ee Ontaariyo ayay caawiyaan.

Markaad bulshadaada cusub ku soo biirto ayaad u tegi kartaa mid ka mida ururrada dejinta.

Waxad taxa magacyada ururradaa ka heli karta bogga shabakadda Settlement.org qaybta “Find Help Close to Home” ee cinwaanka shabakadda - **www.settlement.org/FD/04**.

Xarumaha gargaarka guri dejinta

Bulshooyin ama Jaaliyado badan baa leh xarumaha Gargaarka Guriyaynta si ay dadka uga caawiyaan in ay helaan guryo raqiis ah. Waxaad isticmaali kartaa adeegyadan marka aad timaaddo Ontaariyo oo keliya. Dadka aan lacag badan haysan ayaa isticmaala adeegan.

Urrarada dejinta midkood ayaa ka caawin doona inad hesho xarunta Gargaarka Guriyaynta ee magaaladaada.

Adeegyadooda waxa ka mida:

- In lagaa caawiyo raadinta guri ad degto.
- Macluumaadka adeegyada sharciga iyo Xeerka Kiraystaha Guryaha la Dego – waa sharci daryeela dadka guryaha kiraysta.
- Siyaabaha ad lacagtaada ku dhaqaalaysanayso.
- Inay kaa gargaaraan sidiii ad ula hadli lahayd shaqaalaha bulshada, bixiyeyaasha gargaarka sharciga, bixiyeyaasha guyaha danyarta iyo maamulayaasha guryaha la kiraysto.
- Macluumaadka iyo aqoonsiga qofka guriga leh.
- In lagaa caawiyo codsi u qoroshada haya'daha dejinta.
- In laguu helo hoy magan galyo ama degaanka ardayda oo kale.
- In lagaa caawiyo si aad u hesho barnaamij la xiriira baahiyaha kale sida cuntada, huga ama caafimaadka.

Looxa Ogaysiiska

Looxyada ogaysiiska waxaad ka heli kartaa xarumaa bulshada, doobiga ama meesha dharka lagu dhaqo, dukaanada raashinka, iyo ganacsigyada kale ee xaafadda. Looxyada ogaysiiska waxay inta badan, lagu soo dhejiyaa guryaha bannaan.

Inta badan kulliyadaha iyo jaamacadahu waxay leeyihiin looxa ogaysiiska, bogga shabakadda interenetka iyo xafiisyo guri dejineed si ay uga caawiyaan ardaydooda inay helaan meelo ay kiraystaan. Haddaad arday tahay ka raadi looxa ogyasiiska adeegyada guri dejinta ee kuliyadda ama jaamacadda. Waa ilo wax tar ah.

Mararka qaarkood waxaad ku arki kartaa gurigyaha hortooda ama daaqadaha guryaha ay qolal iyo guryo kiro ahi ka bannaan yihiin calaamado oranaya **"Waa kiro"** ama **"Waa bannaan yahay"**. Waad wayddiin kartaa maamulayaasha guryaha dabaqyada ah in dhawaan guri bannaanaan doono iyo in kale. Wayddiiso inay kugu daraan sugayaasha.

Qaraabada iyo saaxiibbadaa way ogaan karaan hadday meelo ijaar loo rabo. U sheeg inad guri raadinayso.

Marka hore raadi dhismayaasha yaryar ama raadi mulkiilayaasha kiraynaya guri ama qol aqalkooda ka bannaan. Shirkado waaweyn ee guryaha kireeya qaarkood waxay kaa rabaan inad siiso magacyada dad magaalada deggan oo ku yaqaana. Haddii ad taa waydo waxay ku wayddiin doonaan rahaamad badan inta aanay guri kaa kirayn.

Halkan ka ogow macluumaad dheeri ah: sidaan u heli karaa guri ama dabaq an kiraysto? - **www.settlement.org/FD/05**.

CODSIYADA IYO WARAAQAHA CADDAYNTA AH

Warqadaha soo socda ayaa suurowda in lagu wayddiiyo markaad codsi u qorato guri ad degto:

- Warqad ka timi cidda ad u shaqayso oo cadaynaysana dhakhligaaga.
- Warqad bangi oo caddaynaysa inad haysato lacag kugu filan.
- In la baaro taariikhdaadi dayn qaadashada.
- Dammiin ama cid kula saxiixda heshiiska guriga (qof ku ballan qaada inuu bixinaayo kiradaada hadii aad awoodi waydid), haddii dakhligaagu yaryahay ama hadiiba aanad wax dakhli ah lahayn.
- Tix raac shaqsiyadeed oo ay soo qoraan, mulkiilayaal guryo hore ad ka kiraysatay, saaxiibbo, shaqaalaha dejinta ama macallin luqadeed.

Qaxoontiyada cusub iyo soo galaytigu badankoodu way hanti yaryihiin, ma shaqeeyaan dad badanna Ontaariyo kama yaqaannaan. Warqadaas oo dhan ma keeni karaan.

RAHAAMADAHA (DEEBAAJIGA)

Sida caadiga ah waa inaad rahaamad u bixisa kirada bisha ugu danbaysa inta aanad u guurin. Rahaamaddaa (Deebaajiga) waxaad u bixin karta lacag caddaan ah, jeeg, jeeg huban (certified cheque) ama jeegga Boostada. Marwalba wayddiiso in lagu siiyo caddayn in lacagtaa bixisay.

Haddii biyaha iyo korontadu aanay ku jirin kirada, waa inaad la xiriirto shirkadda biyaha iyo korantada si ay kuugu furaan xisaab gaar ah kuuguna bilowdo adeegyada.

Ha u bixin deebaaji wax ka badan kirada bisha ugu horaysa iyo tan ugu dambaysa, waa inaad heshaana rasiidh qoran. Mulkiilaha gurigaagu waa inuu kaa siiyaa faa'iido deebaajiga sanad kasta. Mulkiilaa gurigu wuxu ku siin doonaa deebaajiga iyo wixii faa'iido laga helay markaad ka guurto gurigiisa. Tani waa nooca keliya ee deebaajiya sharciguna oggol yahay.

Waa sharci darro in mulkiilaha gurigu waydiiyo kiraystaha inuu bixiyo "deebaji damaanad qaad ah" (rahaamad) si loogu mag dhabo wax yeelo suurto gala ah oo soo gaadha (guriga) ama fure lagu beddelo maxaayeelay rahaamadani way ka badan tahay qiimaha furayaasha lagu badelo.

HEESHIISKA KIRADA GURIGA

Marka mulkiile guri oggolaado codsigaaga, waxa uu diyaar u yahay inuu kaa kireeyo guri. Markaa ka dib waxaad saxeexi heshiis kiro guri. Tanina waa heshii sharci ah oo u dhexeeya adiga (kirayste ahaan) iyo qofka ama wakaaladda aad ka kiraysatay. Mararka qaarkood mulkiilaha gurigu kuma wayddiinaayo inaad saxeexdo heshiiska kirada guriga. Markaa tan waxaa loogu yeedhaa bil bil kiraysi.

Waad dooran kartaa inaad saxeexdo heshiis kiro guri ama bil bil kiraysi. Labadaa siyoodba. Adiga iyo mulkiilaha gurigaaguba waa inaad adeecdaan sharciyada loogu talo galay qodobka kiraystayaasha degaanka.

Warqada heshiiska kirada u akhri si taxadar leh. Waa inaad aqbashaana dhamaan qodobada heshiiska kirada ka hor inta aanad saxeexin.

Heshiiska waxa ku qoran:

- Muddo intee le'eg ayuu heshiisku soconayaa (badanka waa 12 bilood).
- Lacag intee le'eg ayaad kirada ku bixinaysaa
- Goormay kiradu kordhi doontaa
- Maxaa kaloo oo ku jira kirada (tusaale ahaan, biyo iyo koronto ama halka baabuurta la dhigto)
- Macluumaadka iyo sharciyo kale oo u yaalla guriga.

Dhammaadka heshiiska kirada waad cusboonaysiisan kartaa ama bil bil ayaad u kiraysan kartaa. haddaad doonayso inaad guurto, waa in aanad saxeexin heshiis cusub. Waa inaad warqad u qortaa mulkiilaha guriga 60 cisho ka hor kuna sheegataa warqadda xiliga aad ka guurayso guriga.

Kiraystuhu waa inuu:

- Waa inaad Kirada bixiyso waqti hore. Kirada waa lagugu yara lahaanyaa maalinta u horraysa bil kasta, laakiin heshiiska gurigay ku qoran tahay.
- Gurigu nadiif ha ahaado, xashiishkana ku rid halka loogu talo galay.

- ha u oggolaan in dad siyaado ahi kugula noolaadaan guriga (booqdayaashu laga yaabee inay kula joogaan ayaamo, laakiin ma aha waqti dheer).
- Ha rabshin kiraystayaasha kale.

Kiraystayaashu waxay xaq u leeyihiin:

- Guri nadiif ah oo si wanaagsan loo daryeelay oo leh koronto, biyo socda, qalabka guriguna shaqaynayaan (talaajadda iyo shooladda) waxna kululaynayaan.
- Si loo xaqdhawro arrimaha kuu gaarka ah, mulkiiluhu waa inuu kuu keenaa warqad 24 saacadod ka hor inta aanu gurigaaga soo gelin hadday dhacdo hawl degdeg ah mooyaane (tusaale ahaan, Dab)
- Inad dhamaysato waqtiga kiradaada laguu oggol yahay ee ku qoran heshiiska guriga amaba sharci ga ah.

Ka dib markaad guriga soo degto samee qorshe ah sidii ad yeeli lahayd haddii dab qabsado guriga. Reerkaagana u taba bar. Hubi inay shaqaynayaan aaladaha dabka sheega ee dhawaaqa marka qiiq jiro. Waligaa ha ka saarin baatariyada aaladda qaylisa adigoo ka beddeelaayo mooyee.

Inad hantida gurigaaga caymis galisaa waa fikrad wanaagsan.

Waxad ka heli kartaa macluumaad dheeraada oo khuseeya guri ka helidda Ontaariyo, halkan qaybta guriyaynta - **www.settlement.org/FD/06**.

CAAFIMAADKA

Aad ayay muhiim kuugu tahay inaad ogaato qorshaha caafimaadka Ontaariyo ka hor inta aanad iman. Dawladda Kanada iyo dawlad goboleedku waxay ururiyaan canshuuro si loogu bixiyo adeegyada daawaynta iyo caymiska caafimaad. Qorshaha caymiska caafimaad ee Ontaariyo (OHIP) waxay bixisaa adeegyada bilowga ah iyo xaladaha caafimaad ee degdeg ah oo lacag la'aan ah uguna deeqdaa degganayaasha Ontaariyo.

CODSI U QORASHO QORSHAHA CAYMISKA CAAFIMAAD EE ONTAARIYO. (OHIP).

Kaarka caafimaadka.

OHIP waa qorshaha caymiska caafimaad ee Ontaariyo. Waxay bixisaa adeegyo badan oo kala gedisan oo daryeel caafimaad ah. Waxay bixisaa inta badan bilowga iyo adeegyada degdeg ah ee daryeelka caafimaad.

OHIP ma bixiso qiimaha daawaynta ama adeegyada ilkaha. Bixiyayaasha adeegyada daryeelka caafimaadka, sida dhakhaatiirta, cusbataalada iyo bukaan socod eegtadu, waxay eegi doonaan kaarkaaga caafimaad (OHIP) markasta oo aad xanuun u tagto. Aad bay muhiim u tahay inaad mar walba sidato kaarkaaga caafimaadka sidaa si laguu daweeyo markaad xanuun degdeg ahí ku helo.

Inta badan dadka cusubi **MA HELI karaan** kaarka OHIP ilaa ay ku noolaadaan Ontaariyo saddex (3) bilood. OHIP waxay kuu soo diri doontaa kaarka seddex bilood ka dib markaad arjiga u qoroto. Aad bay muhiim u tahay inaad codsato kaarka caafimaadka isla marka aad soo gasho Ontaariyo si ad caymis caafimaad u hesho sida ugu dhaqso badan.

Arji u qoroshada, waa inaad tagto xafiiska OHIP. Wac Wasaaradda Caafimaaka ee ONTAARIYO iyo daryeelka muddada dheer wayddiina halka xafiiska ugu dhawi yahay. Tilifoonkoodu waa **1-800-268-1153**, kaas oo lacag la 'aan ka ah meelkasta oo ONTAARIYO ah ama **416-327-4327** haddii aad ka soo wacayso TORONTO.

Marka aad tagto xafiiska OHIP, waxaad u baahan tahay inaad foom buuxiso, waa inaad keento waraaqaha asalka ah ee caddaynaaya xaaladdaada qaxoontinimo iyo inaad ku nooshahay ONTAARIYO. Haddii aad leedahay carruur 15 ½ sano jir ah iyo ka wenyba, waa inay kuu raacaan xafiiska. Shaqaalaha xafiiska OHIP waxay carruurta ka qaadi doonaan sawirkooda loogu talo galay kaarka.

kaarka caafimaadka way kuu soo diri doonaan, kaddib markay OHIP aqbasho arjigaaga.

Waa fikrad wanaagsan in la iibsado caymis caafimaad lagana iibsado shirkad gaar ah si dhaqso ah, si ad hesho daryeel caafimaad inta lagu guda jiro saddexda bilood ee sugidda. La xiriir Ururka Cayminta Nafta iyo Caafimaadka bulshada Kanada (CLHIO) si aad u hesho war khuseeya shirkadda caymiska oo wac **1-800-268-8099**, tilifoonkaas oo lacag la'aan ka ah meel kasta oo ONTAARIYO ah.

Caymiska Caafimaad ee khaaska ah

Waxaan kuu haynaa magacyada shirkadaha caymiska ee khaaska ah kuwaas oo bixiya qorshayaal caymis caafimaad ah oo qofku iibsanayo. Laga yaabe inaan la diiwaan gelin dhammaan shirkadahaas bixiya caymiska. Annagu ma taageerno shirkad gaar ah. Waanay fiican tahay in lala tashado shirkado badan si aad u hesho caymiska kuu wanaagsan.

Sida badan, waxad shirkadda caymiska wayddiisaa inay qaxootiga galin karaan caymiska ku habboon qof Kanada Dalxiis ku ah. **Waa inaad ku iibsataa caymis 5 cisho gudahood marka aad ONTAARIYO timaadid haddii kale shirkadaha caymisku lagamayaabo inay caymis ku siiyaan,** Ka raadi halkan caymis caafimaad oo kala duwan looguna talo galay qaxootiga cusub - **www.settlement.org/FD/07**.

Way fiican tahay in la ogaado qodobbada soo socda:

Shirkadaha caymisku waxay maalin walba ka qaadaan qofkasta ujuuro (lacag) joogto ah, waxaanay ku xiran tahay ujuuradu da'daada iyo nooca qorshe aad hesho, ujuuradaa joogtada ahi waxay ka bilaabmi kartaa $2.00 maalin walba wayna ka badan karta $8.00 maalin walba.

Badanaa shirkadaha caymiska ee gaarka ahi ma bixin doonaan daawaynta xaaladaha caafimaad ee aad qabtay ka hor intii aanad helin caymiska, xitaa haddiiba aanad aqoon xanuunadaa.

Waxaa jira waqti yar oo la sugo ka hor inta aanad ku dallicin shirkadda caymiska qaan sheegad.

Inta badan caymiska way ku jiraan wixii gargaar bukaan oo ah, daawaynta lagama maarmaanka ah, baadhitaan caafimaad iyo dawooyinka uu dhakhtarku qoro.

badanaaba qorshaha caafimaad ee caymiska gaarka ahi wuxuu ugu talo galay dadka cusub in aanay bixin baadhitaanka “joogtada ah” waana inay u tagaan dhakhtarka qoyska.

Markaad u baahan tahay adeegyo caafimaad, marka hore la hadal wakaaladda caymiska, wayddiina inay bixinayaan in kale.

HELITAANKA DHAKHTAR AMA DHAKHTARKA ILKAHA

Dhakhtar

Dhakhtar qoys waxaa kaloo lagu magacaabaa “Family physican” (dhakhtar qoys) ama General Practitioner (G.P). Dhakhtarka qoyskaagu sida caadiga ah waa qofka ugu horreeya ee aad aragto marka aanad caafimaadka qabin ama markaad bugto. Waxaad u baahan tahay inaad hesho dhakhtar qaabbilaya dad cusub.

Markaad haysato dhakhtar qoys, waxaad u tagi doontaa markaad xanuusanayso, haddii aanay ahayn xaalad degdeg ah. Markaasna Waa inaad tagto cusbataal. Dhakhtarkaagu wuxu hayaa diiwaanka xaaladahaaga caafimaad iyo sidii loo daweeyay wuxuna la socdaa adiga iyo qoyskaagaba.

Sida loo helo dhakhtar qoys

Raadi adeeg dhakhtar: isticmaal adeegyada wax ogaalka ee ururrada takhaatiirta iyo qallinka ee ONTAARIYO si ay kuugu soo ogaadaan dhakhtarka agagaarkaaga. Waxaadna ka wici kartaa **1-800-268-7079 (ext) 626 (Toronto – 416-967-2626)** meelkasta oo gudaha ONTAARIYO ah.

Diiwaanka huruudda ah ee tilifoonada: dariiqo kale oo lagu heli karo dhakhtar waa in laga raadiyaa diiwaanka hurruudda ah ee tilifoonnada (yellow pages) ee buugga tilifoonada xaafaddaada. Ka hoos eeg cinwaanada “ doctor, surgeon, family medicine, family practice ama family doctor” oo macnahoodu yahay takhtar ama takhtar qoys.

Xitaa waxaad wayddiin kartaa saaxiibbadaa ama qaraabadaada haddii dhakhtarkoodu uu aqbalaayo macaamiil cusub. Ha sugin markaad bukooto inad dhakhtar qoys raadiso.

Laga yaabee in aanad dhakhtar dad cusub qaabbilaya ka helin agagaarkaaga. Waxaa laga yaabaa inaad u baahan tahay in aad tagto bukaan socod eegto. Goobahaas bukaan socod eegtada ah, waxaay haystaan dhakhtaro, kalkaaliyayaal, iyo kuwo kale oo ka shaqeeya daryeelka caafimaadka.

Cusbataalo badan ayaa leh bukaan socod eegto loogu talo galay dhibaatooyinka xaaladaha caafimaad ee aan degdegta ahayn. Dhakhaatiirta qaarkood ayaa kordhiya saacadaha (shaqada) markaa waad u tegi kartaa dhakhtarka fiidkii ama dhammaadka usbuuca (sabti iyo axad).

Isticmaalka bukaan socod eegtada waxa ka wanaagsan inad leedahay dhakhtar qoys, laakiin waad ka heli doontaa daryeel caafimaad. Uma baahnid inaad ballan samaysato si aad u tagto bukaan socod eegtada, laakiin waa inaad sugtaa saacad si aad dhakhtarka ula kulanto. Si aad u hesho bukaan socod eegto kuu dhaw ka fiiri Diiwaanka huruudda ah ee tilifoonnada (yellow pages) ee buugga tilifoonada xaafaddaada waxanad ka hoos eegtaa cinwaanka "medical clinics" oo ah bukaan socod eegto caafimaad.

Dhakhtarka ilkaha:

Raadi adeeg dhakhtar ilkood: isticmaal adeegga macluumaadka ee ururka dhakhaatiirta ONTAARIYO si aad dhakhtarka ilkaha uga hesho meeshaad deggan tahay. Si aad uga hesho dhakhtarka ilkaha meelkasta oo Ontaariyo ah marka laga reebo Toronto ka wac nambarkan **416-922-3900** lacag ayaa lagaa rabaa wicida meeshan fog.

Si aad Toronto uga hesho dhakhtar ilkaha kala hadal dugsiga wax barashada ilkaha ee Toronto, nambarkan **416-967-5649**.

Diiwaanka tilifoonnada: waad ka raadin kartaa dhakhtarka ilkaha buugga tilifoonada xaafaddaada, adoo ka hoos raadinaya cinwaanka "dentist".

Barnaamijyada rugaha caafimadka ilka

Haddii ay jaamacad ama kuliyadi ku taalo magaaladaada, laga yaabee inay siiso bulshada qorshe ilko daawayneed oo loogu talo galay bulshada. Adeeggan waxa sida badan fuliya ardayda barata cilmiga ilkaha oo ay kormeerayaan dhakhatiirta ilkuhu. Adeeggu waa lacag, laakiin wuu ka qiimo jaban yahay markaad dhakhtar ilkood u tagto.

Qorshaha cayminta caafimaad ee Ontaariyo (OHIP) ma bixiyo adeegyada ilkaha. OHIP wuxu bixin doonaa uun haddii bukaha noloshiisu khatar ku jirto, iyo haddii daaweyn cusbataal Loo baahdo.

Inta badan magaalooyinka Ontaariyo, Ururka Caafimaadka Ilkaha ee degmada ama Waaxda Caafimaadka Dadwaynaha ayaa waxay bixinayaan xoogaa daawaynta ilkaha oo lacag la'aan ah, sida ay doontaba ha ahaatee adeegyadaasi waxa kaliya oo loo heli karaa dad gaar ah oo ay ka mid yihiin waayeelka iyo carruurta. La xiriir waaxda caafimaadka bulshada si aad u ogaato adeegyada laga heli karo xaafaddaada.

Halkan ka raadi xog ku saabsan sidii ad u heli lahayd dakhtar ilkood - **www.settlement.org/FD/08**.

RUGAHA CAAFIMAADKA DADWAYNAHA

Haddaad u baahantahay daryeel caafimaad laakiin aanad haysan kaarka OHIP ee caafimaadka, waxaa laga yaabaa inaad caawimo ka heli kartid goobaha caafimaadka bulshada (community Healthy centres. CHC) Adeegyada rugaha caafimadka dadwaynaha waa lacag la'aan ama waa qiime yar. Dhammaan baadhitaanka caafimaadku waa ~~sir~~ waa qarsoodi.

CUSBATAALADA IYO GARGAARKA DEGDEGGA AH

Cusbataallada waxaad u tagtaa oo kaliya garggaarka degdegga ah, qalliinka, ummulin ama aad ka samayso baadhitaan gaar ah ama daaweyn caafimaad. Marka aad tagto cusbitaalka, waxaad u baahantay inaad sidato kaarkaaga OHIP (healthy card)

GURMADKA DEGDEGGA AH

Xaaladaha caafimaad ee halista ah, waxad tilifoonkaaga ka wacda 911. Haddii adiga ama qof kale oo qoyskaaga ka mid ahi uu si lama filaana u xanuusado (xumad aad u daran yeesho, u suuxo

ama miyir beelo, neefsan kari waayo, u dhiig baxo, qallal kadis ahi ku dhaco, ama shil khatar ahi ku dhaco waa inaad wacdo 911.

Haddii aanad ku hadli karin ingiriisida, iska dheh "HELP" una sheeg tilifoon xiriiriyaha luqadda aad ku hadasho. Waxay keeni doonaan turjumaan ku hadla luqaddaada. Baabuurka bukaanka qaada, booliiska iyo waaxda dab damiskuna waxay iman doonaan dhammaantood isku mar.

Diyaar u ahow inaad tilifoonka ka sheegto warkan soo socda.

- Sharax waxa dhacaaya
- Halka aad joogto
- Magaaacaga, cinwankaaga, iyo tilifoonkaaga.

tilifonka ku sii hadal ilaa inta uu qofka kula hadlaya ku yidhaahdo iska dhig (xidh).

Haddii aad u tagto cusbitaal kuu dhow garggaar degdeg ah, tag waaxda (qaybta) garggaarka degdegga ah ama qolka garggaarka degdegga ah (EMERGENCY ROOM). ER tu waa mashquul inta badan, inay xaaladdaadu nolol iyo geeri tahay mooyaane waxa suuroobi karta inay kugu qaadato dhawr saacadood inad dhaxtar aragtaa.

Haddii aanad lahayn OHIP iyo caymis caafimaad oo khaas ah, cusbitaalku wuxu kuguso dallici doonaa kharashkii ambalaaska lagugu qaaday iyo wixii daryeel caafimaad ee kale ee lagu qabtayba.

GARGGAARKA XALADDA QALALAASAHA

Xarumaha lagu xalliyo qalalaasuhu waxay bixiyaan la talin 24ka saac maalin walba. Taladaasina waa lacag la'aan waana qarsoodi.
Wac xarunta qalalaasaha haddii :

- Aad ku fekerayso inaad is disho
- Haddaad u malaynayso in qof kale ku fekeraayo inuu is dilo
- Haddaad rabto inad cid la hadasho si ad isku faaruqiso.

Waxaad ka heli tilifoon nambararada dhibaato/rafaad adoo booqda - **www.settlement.org/FD/04.**

TILIFOONKA CAAFIMAADKA ONTAARIYO

Haddii aad bugto, laakiin aanad garanayn inaad u baahan tahay inaad aaddo waaxda garggaarka degdegga ha iyo in kale, la hadal tilifoonka caafimaadka Ontaariyo.

Tilifoonka caafimaadka Ontaariyo waa lacag la'aan qarsoodina ah oo ad wici karto si ad u hesho talo caafimad adigo la hadli doona kalkaaliye sare. Waana la heli karaa 24ka saacadood ee maalinta iyo 7da cisho ee usbuuca. Adeegyadan waxaa lagu bixinayaa ingiriisi iyo faransiis oo ay weheliso turjumid loo heli karo qaar luqadaha kale ah.

Ka Wac 1-866-797-0000 meel kasta oo Ontaariyo ah.

Markaad wacdo tilifoonka caafimaadka Ontaariyo waxaad la hadli doontaa kalkaaliye sare. Kalkaaliyuhu wuxuu ku weyddiin doonaa inaad faahfaahiso dhibaatadaada iyo sida ay halis u tahay. Kalkaaliyuhu wuxu kuu sheegi doonaa siyaabaha ad isku daryeel karto ama inad u baahan tahay in dhakhtar aragto iyo in kale ama wuxu ku siin doonaa tilifoonnada rugaha caafimaadka dadwaynaha ee kuu dhaw. Ha wicin tilifoonka caafimaadka haddaad ogtahay in ay arrintu geeri iyo nolol tahay.

Hadday geeri iyo nolol tahay nambar ad wacdo waxa ugu horreeya 911

WASAARADDA CAAFIMAADKA IYO RUGAHA CAAFIMAADKA DADWAYNAHA

Wasaaradda Caafimaadku waxay xoogga saartaa fayo qabka dadwaynaha. Dadka meheradoodu caafimaadka dadwaynaha tahay waxa ku jira dhakhtarka, dhakhtarka ilkaha,

kalkaaliyeyaasha, nafaqeeyayaal iyo kuwo kale oo ku xeel dheer daryeelka caafimaad. Wasaaradda Caafimaadka Dadwaynaha adeegyadeedu waxay qaabbilsan yihiin saddex arrimood: ilaalinta caafimaadka (ka hor tagga cudurada), ogaashaha astaamaha cudurka iyo wacyi galinta dadwaynaha.

Kuwa ku xeel dheer caafimaadka guud waxay adeegyo iyo macluumaadba ka bixiyaan dugsiyada iyo goobaha shaqada. Tusaale ahaan, waxa laga yaaba inay kalkaaliyeyaal carruurta tallaalaan injirta madaxana ay ka baadhaan intay dugsiga joogaan.

Haddii laanta socdaalka iyo muwaadinimadu ku siiyaan foomka ka foojignnaanta xaaladaha caafimaad ee waxyeellada keeni kara (Medical Surveillance Undertaking Form) waxaad u baahantay inaad u tagto Waaxda Caafimaadka Dadwaynaha ee xaafaddaada muddo 30 cisho gudahood ah ka dib markaad soo gasho Kanada.

DAAWAYNTA IYO DAAWO QORISTA

Qorshaha caymiska caafimaad ee Ontaariyo (OHIP) ma bixiso dawooyinka dhakhtarku kuu qoro.

Haddii dhakhtarkaagu dawo kuu qoro waa inaad ka qaadato daawada farmasiga (daawo gadaha). Shaqaalaha farmasiigu waa fayo dhawrayaal garanayaa, kuna siinaya daawada dhakhtarkaagu kuu qoray. Waxay ka shaqeeyaan farmasiyada ama meelaha dawooyinka lagu hayo, cusbataalada iyo xarumaha caafimadka bulshada.

Shaqaalaha Farmasiiyadu::

- waxay hubiyaan xaddiga dawada ad qaadanaysa inay sax tahay
- waxay kuu sheegaan dhibaatoyinka dawada kaaga iman kara.
- waxay kuu sheegaan in dawada dhaxtarku kuu qoray iyo dawoonyin kale haddii ad qaadato inay is diidayaan iyo in kale.
- waxay kuu faahfaahiyaan sidaad dawada u qaadanayso
- waxay ka jawaabaan wixii su'aal ah ee dawada ka qabto.

Dawooyinka la qoraa waa qaali.

Farmasiiyada badankoodu waxay lacag bay ku qaataan inay dawada diyaariyaan. Lacagta daawo diyaarintu waa lacag ujuuro ah farmasigu kaa qaadayo si dawada laguugu diyaariyo. Ujuuradu waxay u dhaxaysaa $1.95 ilaa $16.95. Daawo gadayaashu waxay ku daraan lacagtan qiimaha daawada.

Ka raadi macluumaad dheeraad ah oo khuseeya daryeelka caafimaad ee Ontaariyo adoo isticmaalaaya halkan - **www.settlement.org/FD/09**.

SHAQO

NAMBARKA CAYMISKA BULSHADA (SIN)

Waa inaad lahaato nambarka caymiska ee bulshda si aad uga shaqayso Kanada.

Sharci maaha in loo shaqeeye ku shaqo ku siiyo nambarkaa la'aantii. nambarkan waxa loo isticmaala markaad dalbanayso adeegyada dawladda ama aad bixinayso cashuurahaaga.

Dalbka SIN

Si ad u dalbato SIN waxaad u baahantay inaad tagto xarunta adeegyada kanada. Wac **1-800-206-7218** si aad u hesho xarunta kuugu dhow ama gal boggan shabakadda - **www.settlement.org/FD/04**.

Markad tagto xarunta adeegga ee kanada, waxaad u baahan tahay inaad buuxiso foom. Waa inaad tustaa waraaqahaaga asalka ah si aad isu caddayso adiga ama u cadeyso xaaladaada qaxoontinimo. Si aad u ogaato waraaqo noocee ah ayay aqbalayaan gal bogga internetka ee adeegga kanada halkan **www.settlement.org/FD/21** ama tilifoonka kor ku xusan ayaad kala hadli kartaa. Markay aqbalaan codsigaaga waxay kuusoo dirayaan kaadh uu ku dul dhegan yahay SIN (social insurance number)

Tus kaarka SIN ciddaad u shaqayso

Loo shaqeeya yaashu waa inay wayddiiyaan dhammaan shaqaalaha cusub SIN kaadhkooda si ay u arkaan (kaarka) isla marka ay ku shaqaaleeyaan. Waa inaad tustaa kaarkaas (SIN) ciddaad u shaqayso saddex maalmood gudahood markaad shaqada bilowdo.

Haddii tirada kaarka SIN ku u ka bilaabmo "9" waxad ogaata inu yahay mid ku meel gaadh ah. "9" waa SIN ku meel gaadh ah. Intaan aan shaqada laguu oggolaann qofka ad shaqaysaa waa inu hubiyaa ogolaanshahaaga shaqada ee rasmiga ah kana soo eegaa laanta socdaalka iyo muwaadinimada kanada.

Kaarkaaga SIN cid walba ha tusin

Ganacsiyo badan ayaa wayddiiya dadka SIN iyagoo uga jeeda aqoonsi ahaan ama inay ogaadaan heerka dayn bixintaadu sida ay tahay.

Kaarkaaga SIN aqoonsi ma aha. Ha tusin SIN kaarkaaga ama ha siin nambarkaaga dadka aan u baahnayn. Ma jiro wax sharci ah oo ka joojinaaya ganacasi inuu ku weyddiiyo SIN kaarkaaga, laakiin uma baahnid intaad tusto.

Dadka qaar baa isticmaala SIN kaar lumay ama mid la xaday si ay u helaan xogta gaar ee qofka iyo inay dadka, ganacsiga iyo dawladdaba wax ka xadaan.

Haddii qof kale ku shaqaysto kaarkaaga SIN lacagta qofkaasi soo gashay cashuur baad ka bixin doonta.

Sharcigu wuxuu dhigayaa in aad tustaa SIN kaarkaaga qaybaha dawladda heer walba iyo dhammaan shirkadaha kuwa aad lacagi kaa so gasho ama ad ka hesho dulsaar lacageed sida (bangiyada, iskaashatooyinka daynta)

HELITAANKA SHAQADA

Miyay fududdahay in shaqo laga helo Ontaariyo? waa su'aal ay dad badan oo cusubi wayddiiyaan madalaha wada tashiga shabakadda dejinta ee settlement.org. Jawaab ka fududi ma jirto in la yiraahdo ma fududa in Kanada laga helo shaqo u qalanta xirfaddaada iyo waayo aragnimadaada.

In badan baad maqli doonta iyadoo dadka loo shaqeeya ay shaqaalaha cusub wayddiinayaan inay waaya aragnimo Kanada ah leeyihiin iyo in kale. Waaya aragnimada Kanada maxay u doonayaan? Dadka loo shaqeeyaa waxay u haystaan inay waaya aragnimada Kanada muujinayso inad taqaanno af ingiriis wanaagsan oo ad dadka la macaamili karto iyo inad garanayso jawiga shaqada Kanada.

Waxaad u bahaantay inaad barato sidaad u tusi lahayd aqoonta iyo waaya aragnimada ad dibadda kala timid qiimaha ay leeyihiin. Dadka loo shaqeeyo badankoodu ma garanayaan sidii ay u qiimayn lahaayeen waaya aragnimadaada, sidaas darteed, waxad u baahan tahay inad u muujiso faa'iidada ay ka helayaann waaya aragnimadaada shaqo ee ad dibadda kala timid.

Aqoonta Afka

Aad bay muhiim kuugu tahay inaad taqaano ingiriisi wanaagsan markaad aadayso Ontaariyo.

Ingiriisigu waa luqadda ugu weyn luqadaha lagaga hadlo gobolka, inaad si wanaagsan ugu hadashaana waxay kaa cawinaysaa shaqada waxa kale oo ay kuu dhib yarayn doonta sidii ad bulshadaada cusub u dhex degi lahayd. Bulshooyin badan ayaa ku hadla afaf kala duwan, dad afkaaga ku hadlana waad arki doontaa, laakiin haddii ujeedadaadu tahay inaad u degto Ontaariyo si joogto ah, waa inaad barataa sida loogu hadlo, loo qoro, loona akhriyo afka ingiriisida.

Dhaqanka Ganacsiga

Way kala duwan yihiin siday dadku shaqada iyo ganacsiga u qabsadaan marka la barbar dhigo dalkii ad ka timid sidii loo shaqayn jiray ama loo ganacsan jiray. Ummadda dal kastaaba waxay leedahay siyaabo u gaar ah oo loo ganacsado ayna kaga duwan yihiin dalalka kale. Cidina kuuma sheegi karto siday hawluhu u kala duwan yihiin. Waxad u baahan tahay inad Ontaariyo ka shaqayso si ad u aragto farqiga shaqo ama kan ganacsi ee u dhexeyaa halkan iyo dalkaagii. Markaad intaa fahamto ayaad qancin karta hantiilayaasha una sheegi karta inad tahay qofka ay u baahan yihiin oo wax ku kordhin kara shirkaddooda.

Way adag tahay inad rumaysato, laakiin lagama yaabo inaad si degdeg ah u hesho shaqada ad ku hammiyayso. Waa inaad horta soo martaa shaqooyin "qadaa-ma-dhergge" ah marka ugu horeysa ee aad timaaddo. Haddii aad nasiib leedahay waxaa laga yaabaa in shaqadani noqoto, xirfaddaadii ad baratay, laakiin ay ka heer hoosayso shaqadii aad qaban jirtay ka hor intaanad iman.

Raadinta Shaqada

Dadka cusubi waxay la kulmaan waaya aragnimo kala duwan markay shaqo raadinayaan. Qaar ayaa bilo gudahood ku hela shaqo la mid ah tay hayeen. Qaar kalena waxay ku qaadata sannado. Inta aanad iman ka hor wakhti u hur inad baadho suuqa shaqada Kanada. Ogow wixii taageero ah ee aad heli kartid iyo sida ugu fudud ee shaqo looga helo Ontaariyo.

Way kala duwanaan karaan sida Ontaariyo shaqada looga raadsado iyo sidaad u baratay in loo raadsado. Waa suragal inad laba yaabban tahay inad u baahan tahay inad shaqo raadiso. Waxa laga yaabaa inad u baahato barashada sida loo qoro taarikhdaada shaqo iyo tan waxbarasho (resume) oo ad samaysato gal hawleedkaagii shaqo. Miyaad taqaanna nooca taariikhda shaqo iyo waxbarasho ee ay hantiileyaasha xirfaddaadu kaa doonayaan? Waxa laga yaaba inad gargaar u baahato si ad Kanada shaqo uga hesho.

Caawimo helid

Dawladdu uma qaban qabiso dadka shaqooyinkaa. Laakiin waxay haysaa barnaamijyo kaa caawin doona sidaad shaqo u heli lahayd, ta kale, barnaamijyadaasi kuma siin doonaan shaqo. Haddii qof kugu yiraahdo waxaan kuu dammaanad qaadayaa shaqo, laga yaabee inu wax kaa iibinayo. Sidaad darteed, ka foojignow inad lacag siiso.

Ururrada bulshada badankooda waxa laga helaa adeegyo dadka cusub ka caawiya siday shaqo u heli lahaayeen. Adeegyadan waxad iyagoo lacag la'aan ah ka helaysaa ururka xaafaddaada.

Ma dhib yara inay dadka cusubi Ontaariyo shaqo ka helaan. Waa maxay sababtu? Waxa hoos ku yaalla qodobbo ad u baahan karto inad barato ama ad ka fekerto:

- Sida loo helo shaqooyin aan la xayaysiin
- Waa inaad hubiso in aqoontada luqadeed ay ku habboon tahay shaqada ad doonayso.
- Diyaar ma tahay inad shaqadaada ugu horraysa meel hoose ka bilawdo, ama ad shaqo u bilawdo shirkad yar ama mid dhexdhexaad ah?
- Miyaad taqaanaa dhaqanka shaqada Kanada iyo muhimadda ay leeyihiin xiriirka dadka, wada shaqaynta iyo xeeladaha maamulka ururrada?

Ha filin inaad ogaato wax kasta oo la xiriira dhaqanka shaqada kanada marka kuugu horreysa ee aad timaado Ontaariyo. Waxa jira wax badan oo barasho u baahan. Laakiin waxa jira dad badan oo ku caawin doona.

Shayga ugu haboon ee aad samayn kartaa waa inaad gargaar codsataa ururrada dejinta waanay kaa caawin karaan inaad hesho shaqo si ad u degto.

Ururrada adeegga bulshada qaarkood baa kaa caawin kara si aad u hesho talo kuu gaar ah. Mid shaqaalaha ka mida ah ayaa kaa caawin doona inaad samayso taariikhdaadii shaqo, warqadda lifaaqa ah iyo helitaanka shirkadahaba. Ururro kalena waxay hayaan barnaamijyo aad ku dhigan doonto fasal si aad xirfaddaada Kanada shaqo ugaga hesho.

Haddii anad barnaamij ka helin caawimaad, laga yaabee inaad dirto 200 oo codsi shaqo ah cidna aanay kuu soo jawaabin. Hadad caawimo hesho, waa suuragal inaad hesho shaqada aad run ahaantii doonaysid.

Mid kasta oo ka mid ah ururrada adeegga qaxootiga ee Ontaariyo way ku siin kartaa xoogaa caawimo ah si aad u bilowdo shaqo raadintaada. Shabakaddan gal oo eeg "Gargaar ka raadi gurigaaga agtiisa" (Find help close to home) si ad u aragto ururrada kuu dhaw - **www.settlement.org/FD/04**.

Xitaa way kuu sheegi doonaan wixii la xiriira adeegyo shaqo oo loogu talo galo kooxo gaar ah sida:

- Qofkii meheraddiisa dibadda ku soo bartay iyo xirfadlayda
- Dumarka
- Dhalinyarada
- Shaqaalaha waayeelka ah.

Ururrada dejinta ee Ontaariyo badankoodu waxay bixiyan siminaarro shaqo raadin ah oo lacag la'aan ah si ay uga caawiyaan dadka cusub inay bartaan sida shaqo looga helo Kanada. siminaarradu waxay socdaan 3 ama 4 cisho si aad uga qeyb qaadatana waa inaad ahaato qof Kanada Deggan oo sharci u leh inu ka shaqeeyo.

Waxaa Laga yaabaa inay calool xumo ku geliso shaqo raadintu maxaa yeelay ma taqaanid sababaha aanay hantiilayaashu u rabin inay shaqaysiiyaan qof aqoontaada oo kale leh. Waa inaad ogaato waxay hantilaydu rabaan, oo ah wax ka badan xirfadaha looga bahan yahay in shaqada laga qabto.

Waa suuragal inad u baahan tahay inaad xirfado cusub barato ama aad kor u qaaddo xirfadahaaga waxaana jira dariiqooyin badan ood caawimo iyo tababarba ku heli karto. Tababarrada qaar waa lacag kuwo kalana dadka qaarkood lacag lagama rabo. Ururada dejintuna way kaa caawin karaan inad ogaato tabarrada ad qaadan karto.

SHURUUCDA SHAQADA

Dawladda Federaalka iyo tan Gobolkuba waxay leeyihiin sharciyo ilaalinaya xuquuqdaada shaqaalinimo. Xeeraka Shaqada iyo Shaqaalaha ee Ontaariyo ayaa ilaaliya xuquuqda shaqaalaha Ontariyo badankooda.

Qofna kuguma takoori karo da'daada, jinsigaaga, diintaada, qoladaada ama falka saarashada ee ad door biddo. Ciddi ad u shaqaynayso ee qodobbadaas kugu takoortaa waxay jebinaysaa sharciga.

Shaqaalahana sharcigu wuxu saarayaa mas'uuliyad. Waa inad barataa sida sharcigu ugu adeegayo nabad qabkaaga iyo caafimaadkaaga intaad joogto goobta shaqada. Haddii aad doonayso in dadka kale kuula dhaqmaan si caddaalad ah xilliga shaqada, waxaad u baahan tahay inaad barato waxa sharcigu dhigaayo.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan xaqaaga iyo mas'uuliyadaada shaqo waxaad gali kartaa shabakadda Settlement.org qaybta shuruucda shaqada - **www.settlement.org/FD/10**.

QIIMAYNTA WAXBARASHAD IYO XIRFADDA SHAQADA

Haddii aad shaqo codsato ama barnaamij wax barasho, ka loo shaqeeyo ama dugsiga aad shaqada ka rabto waxay ku wayddiinayaan inad keento caddayn (shahaadooyin) heerkaaga waxbarasho iyo tababar. Ciddaad u shaqaynayso ama dugsigu waxay kale ooy kaa rabi doonaan inay ogaadaan sida tababarkaagu ugu dhigmo dibloomaha ama shahaadooyinka Kanada laga bixiyo.

Waxa suuragal ah inad u bahato inad keento qiimaynta shahaadooyinka oo ad tusto.

Qiimaynta shahaadooyinka macneheedu waa inad shahaadooyinkaaga waxbarasho la barbar dhigo kuwa Kanada ee u dhigma. Marka la eego shahaadooyinkaaga waxbarasho waxaad heli doontaa warbixin ama warqad marag u noqota mid kasta oo ka mida shahaadooyinkaaga, dibloomo amaba shahaadada waxbarashada. Warqadani waa inay kuu sheegtaa waxa kanada u dhigma dherejooinka iyo shahaadooyinka ad sidato.

Haddii ad rabto inad ka shaqayso meherad ama xirfad oo ad isticmaasho magac jago (sida Injineer ama timajare) waa inad oggolaasho ama shahaado haysataa. Si ad oggolaashahaas u hesho waa inad iska diiwaan gelisaa ururka xirfadda kala hora. Sida dugsiyada qaarkood, ururradani waxay leeyihiin hab u gaar ah oo ay wax ku qiimeeyaan.

Qiimaynta loo sameeyo cidda ad u shaqaysaa way ka duwan tahay midda loo sameeyo barnaamij waxbarasho.

Markaad Kanada timaddo, waa inad horta u fiirsataa adeegyada qiimaynta ee kala duwan iyo warbixintooda inta aanad adeeggooda isticmaalin. Waxa suurowda inad u baahan tahay qiimayn shaqo, qaxooti, waxbarasho sare, oggolaasho shaqo ama tababar shaqabarad. Isku day inad hesho warbixin loo adeegsan karo ujeeddooyin badan halkaad ujeeddo walba qiimayn gaar ah ugu gadan lahayd.

Macluumaad dheerad ah oo ku saabsan arrimahan, waxad ka eegtaa Settlement.org qaybta Shaqaalaynta (Employment) ee halkan - **www.settlement.org/FD/11**.

WAXBARASHADA

DUGSI QORISTA CARRUURTAADA

Sharciga Ontaariyo wuxu dhigayaa inay carruurta u dhaxaysaa 6 jir ilaa 18 jir dugsi tagaan. Carruurta badankooduse waxay dugsiga ka bilaabaan xannaada carruurta markay jiraan 4 ama 5 sano. Sannad ama laba ka dibna waxay galaan fasalka 1aad. Xannaanada carruurta ilaa fasalka 8aad waxa loo yaqaannaa dugsiga hoose. Fasalka 9aad ilaa kan 12aad waxa loo yaqaanna dugsiga sare.

Waa inad carruurtaada qortaa dugsiga xaafaddaada. Wac guddoonka waxbarasha ee xafaddaada si ad u ogaato meesha u ku yaallo dugsiga kuugu dhaw iyo sidii ad carruurta u qori lahayd. Carruurta da'doodu gaadhay inay dugsi sare dhigtaan waxa laga yaaba inay u baahan yihiin inay raadiyaan barnaamijyo gaar ah oo ka jira dugsiyada qaarkood inta aanay go'aan ka gaadhan halka ay tegayaan. Barnaamijyadaa waxad wayddiin karta dugsiga xaafaddaada ama guddoonka waxbarashada.

Carruurta Ontaariyo joogta badankoodu waxay dhigtaan dugsiyada dadwaynaha. Waxa kaloo jira nidaam gaar ah oo dugsiyada dadwaynaha ee Katooliga ah. Guddoonno xaafadeed oo kala gaar ah ayaa maamula nidaam dugsiyeedyadan. Guddoonka waxbarashada ayaa ku sheegi kara dugsiyada carruurtaadu ay geli karto.

Marxaladda Qaxootinimo ee carruurta ama waalidkooda iyo cidda ka mas'uul ah kama joojinayso inay dugis galaan.

Haddaad dhib ku qabto inad carruurta dugsiga qorto waxad la xiriirtaa xarumaha garggaarka sharciga bulshada ee xaafaddaada.

Sano dugsiyeedku wuxu bilawdaa maalinta ka dambaysa Maalinta Shaqaalaha ee bisha setembar wuxuna dhammaadaa bisha Juun dhammaadkeeda. Guddoon Dugsi oo waliba go'aan u gaar ah ayuu ka gaadhaa inay ardayda u oggolaadaan inay dusgisga galaan haddii sano dugsiyeedka qaarkiis la dhaafay.

Macluumaadka waxbarashad waxad ka heli kartaa "Hagaha Waxbarasha Ontaariyo ee Dadka Cusub" (Newcomer's Guide to Education in Ontaariyo" ee shabakaddan ku qoran - **www.settlement.org/FD/12**.

WABARASHADA DADKA WAAWAYN IYO AQOON KORODHSIGA

Waxad u baahan karta inad qaadato koorsooyin waxbarsho ama inad hesho barnaamij waxbarasho oo ku lugleh meheraddaada. Macluumaadka waxbarashadaada ku lugleh iyo sida loo heli karo waxad ka arki kartaa shabakadda Settlement.org qaybta waxbarashada kana fiiri halkan - **www.settlement.org/FD/13**.

Barashada Afka Ingiriisiga

Markaad timaaddo waxad u baahan kartaa inad aqoontaada ingiriisga kordhiso. Mar haddaad qaxooti cusub tahay waa muhiim inad afka ingiriisiga si dhib yar dadka ugula hadli karto. Waxayna taasi kaa caawin doontaa inad hore shaqo u hesho si sahlanna ad Ontaariyo u degto.

Barashada Ingriisiga Dadka Dhawaan soo Galay (LINC) waa barnaamij lacag la'aan ah oo ingiriisiga ay ka bartaan qaxootiga cusub ee Kanada yimaadda.

Si ad u gasho barnaamijka LINC waa inad:

- ahaato qof Kanada deggan (Landed) ama qaxooti la aqoonsan yahay
- ama ahaato qof cusub oo loo oggol yahay inu Kanada joogo, Haya'adda Qaxootiga Kanadana ay ku tala gashay inay siiso degganaasho rasmi ah, walise aan noqon waddani.

Ama

- ad ahaato qof ka wayn da'dii dugsiga lagaga baxayay (qof 18 sano iyo wixii ka wayn ah)
- Kartidaada af aqooned ka soo hubi xarumaha qiimaynta kartida luqadaha

Fasallada LINC qaarkood waxay leeyihiin meel carruurta lagu xannaaneeyo.

Fasallada LINC Ontaariyo oo dhan waa laga bixiyaa waxana laga helaa meelahan:

- Dugsiyada
- Machadyada
- Hay'adaha dejinta qaxootiga
- Ururrada adeegga bulshada

Is Diiwaan galinta LINC

Si ad isku diiwaan galiso, waa inad tagtaa xarumaha qiimaynta luqadda ee LINC. Xarunta qiimaynta luqadda ee LINC waxay qiimayn doonta aqoontaada luqadda waxayna kaa caawin doontaa diiwaan gelinta dugsiga LINC. Shaqaalaha xaruntu waxay kugu imtixaani doonaan dhegaysiga, hadalka, akhriska iyo qoridda. Imtixaanku wuxu qaadan karaa inta u dhaxaysa saacaad ilaa saddex saacadood. Aqoontaada luqadeed markay sarrayso wakhtiga imtixaankuna wuu sii dheeraanaya.

Waxay xaruntu kaa caawinaysaa inad is qorto fasalka kugu habboon. Waxad wacdaa hay'adaha dajinta midkood ama xarunta macluumaadka bulshada waxanad wayddiisaa halka ay ku taallo xarunta qiimaynta LINC ee kuugu dhaw.

Sidaad ula xiriirayso hay'adahan waxad ka heli karta Settlement.org qaybteeda "Gargaar Hoygaaga u Dhaw Raadi" (Fina Help Close to Home) ee shabakaddan - **www.settlement.org/FD/04**.

Tababarka Sare ee Ingriisiga

Meelaha soo socda waxad ka heli karta tababar sare oo luqadda Ingiriisada ah:

- Jaamacadaha
- Machadyada
- Dugsiyada gaarka ah ee Afka Ingiriisiga
- Ururrada bulshada

Koorsooyinka iyo lacagtaba si toos ah ula xiriir dugsiyada iyo ururradaas. Qaar baa lacag la'aan ah, laakiin waxa suurowda in fasallada qaarkood lacag lagu dhiganayo.

Wixii macluumaad dheerad ah ee luqada ingiriisiga ka eeg settlement.org qaybta Ingiriisiga loo Baranayo Af-labaad ahaan (English as a Second Language – ESL) oo shabakaddan ka eeg - **www.settlement.org/FD/14**.

QAXOOTIGA IYO MUWAADINIMADA

Warqadda Degganaasha Rasmiga ah (caleenta geedka Maple)

Markaad Kanada timaaddo ka dib ayaa laguu soo diri doona warqadda degganaasha ee rasmiga ah. Markaad Kanada soo gasho eed la kulanto laanta qaxootiga waa inad siisaa cinwaan si laguugu soo diro warqadda degganaashaha.

Socdaalka iyo Muwaadinimada Kanada
Xarunta wicidda Kaarka PR (Warqadda Degganashaha)
1-800-255-4541
www.cic.gc.ca

Bartii ad ka soo gashay Kanada haddii Waaxda Socdaalka iyo Waddaninimada (Citizenship and Immigration – CIC) aanad siin cinwaan, sida ugu dhaqso badaqn cinwaan u sii. Shabakadda CIC gal ama la hadal rugta Warqadda Degganaasha si ad u siiso cinwaankaaga.

Markaad cinwaakaaga siiso ka dib haddii 30 maalmood gudahood ad waydo warqaadda degganaasha la hadal Waaxda Socdaalka iyo Waddaninimada.

180 maalmood markaad Kanada soo gashay ka dib haddii Waaxda Socdaalku aanay helin cinwaankaaga, dib ayaad u dalban doontaa warqadda degganaasha waxanad bixin doontaa lacag.

Warqadda Degganaashuhu waa aqoonsi waxayna caddaynaysaa ku sugnaashaga Kanada. Wixii su'aal ah ee ad ka qabto Warqadda Degganaashaha, la hadal xarunta laga waco warqadaha degganaashaha.

SHURUUDDA DEGGANAASHA

Kanada safar baad uga bixi karta markaad timaaddo ka dib. Hase ahaatee, waa inad shantii sannadoodba 730 (2 sano) oo ka mid ad dhex joogtaa Kanada si ad u haysato oo aanu kaaga guban ama kaaga dhicin degganaashahaagu. Taasi macneedu wuxu yahay shantii sanaba saddex ka mid ah ayaad dal kale oo dibadda ah ku noolaan karta. Laakiin haddii ad muddo dheer dalka ka maqan tahay, waxad u baahan tahay inad Waaxda Socdaalka iyo Waddaninimada u caddayso in qorshahaagu yahay inad Kanada ku noolaato.

XUQUUQDA IYO XUDUUDDADA DEGGANYAASHA RASMIGA AH

Xuquuqda Degganyaasha Rasmiga ah

- Inu dego kana shaqeeyo meel kasta oo Kanada ah
- Inu helo gargaar sharci (gargaarka sharciga waxa la siiyaa dadka aan bixin karin kharashka garyaqaanka)
- Inu helo Caymiska Goboleedka Dawada
- Xaqa waxbarashada
- Xaqa shaqaalanimo
- Xaqa sharciga daryeela shaqaalaha
    - Xaqa in lagu dhaqo sharciga badbaadinta shaqaalaha
    - Caafimaad iyo nabad galyo

  - Sharciga shaqaalaynta
  - Caymiska Shaqaalaha
  - Mag dhawga shaqaalaha
- Xuquuqda aadamaha
- Wuxu xaq u leeyahay inu helo adeegyada danta u ah bulshada sida Ha Shaqayso Ontaariyo (Ontaariyo Works), Guryo raqiis ah iyo xannaanada carruurta, guryaha magan galyada, barnaamijyada cuntada iyo arrad tirka lacag la'aanta ah, la talinta iyo gargaarrada kale ee ay bixiyaan ururrada bulshadu.

Xuduuddada Degganayaasha Rasmiga ah

- Waaxda Socdaalka iyo Waddaninimada Kanada way kuu diidi karaan inad Kanda ku noolaato haddii:
  - ad waraaqo been ah iyo war been ah siisay markaad dalbanaysay degganaashaha ama ad dalka soo galaysay
  - aanad fulinin shuruudihi degganashahaaga (hadday shuruudo jireen)
  - lagugu xukumo dambi
  - dawladdu u aragto inad lug ku leedahay basaasnimo, budh cadnimo ama ad dhagar fashay wakhti dagaal.
- Doorashooyinka kama cod bixin kartid iskumana sharrixi kartid xafiis siyaasadeed.

SU'AALAHA QAXOOTINIMADA

Haddii ad wax su'aal ah ka qabtid qaxootinimda, xalkaagu halkuu ku sugan yahay, ama adeegyada waxad la xiriirtaa hay'adaha dejinta midkood. Hay'adaha dejinta markaad bulshadaada cusub dhex timaaddo ayaad heli doonta. Magacyadooda waxad ka heli doontaa shabakadda settlement.org qaybta "Gagaar Guriga u Dhaw Raadi" (Fina Help Close to Home) ee boggan - **www.settlement.org/FD/04.**

Waxa kale oo ad wici karta Waaxda Socdaalka iyo Waddaninimada rugta Su'aalaha (call centre) oo Ontaariyo oo dhan lacag la'aan lagu waco.

Cajalad baa ku siin doonta macluumaadka 24 ka saac, 7 bada maalmood ee asbuuca.

Haddad doonayso inad qof la hadasho waa inad wacda 8:00 aroornimo ilaa 4:00 galabnimo inta u dhaxaysa laga bilaabo lsniinta ilaa Jimcaha. Rugta su'aaluhu waxay macluumaadka ku sheegaan afka ingiriisiga iyo kan fransiiska oo kaliyah.

Wixi macluumaad ah ee ku saabsan socdaalka iyo Muwaadinimada Kanada wac xarunta su'aalah iyo wicitaanka ee Laanta Socdaalka iyo Muwaadinimada Kanada
1-888-242-2100

ADEEGYADA SHARCIGA

XUQUUQDA AADANAHA

Dalka Kanada ragga iyo dumarku way siman yihiin waana isku xuquuq. Xuquuqdaa waxaa lagu fahfaahiyay Axdiga Xuquuda iyo Xorriyadda Kanada. Wixii gaf ah, ha noqdo muruq, maal iyo maskaba ee qof lagu sameeyaa waa sharci daro.

Ururrada Bulshada qaar badan baa u hawl gala inay dadka ka wacyi galiyaan xuquuqda dadka tirada yar ee muuqda (dadka aan cddaanka ahayn), dumarka, khaniisyada lab, khaniisyada dheddig, dadka laxaadka la'a iyo kuwa waayeelka ahba. Xeerka Xuquuqda Aadamaha ee Ontaariyo wuxu dadka ka ilaaliyaa in la takooro.

Takoorku waa hab dhaqan oo aan xaq ahayn kuna salaysan:

- Da'a
- Midab
- Laxaad
- Isir ama farac
- Qolo
- Martabo guur
- Martabo qoys
- Asal
- Dambiilenimo (dambiyo hore ood gashay)
- Saboolnimo
- Diin
- Waddaniyad
- Jinsi
- Lab ama dheddig ahaasho
- ama dookha saarashada

Sharciga xuquuqda aadamaha ee Ontaariyo wuxu dhigayaa inu qof kastaa xaq u leeyahay xorriyad aan takoor lahayn markuu raadsado adeeg, dan iyo waxqabad, guri, qandaraas, shaqo, iyo inu ka tirsanaado urur ama koox.

BOOLIIS

Ontaariyo iyo Kanadaba, booliisku waa ka gaar dawladda iyo ciidanka. Ontaariyo waxa ka jira saddex qaybood oo booliis ah:

- Booliiska gudaha (ama dawlada hoose)
- Booliis goboleedka Ontaariyo (OPP)
- Iyo booliiska qaranka ee lagu magacaabo Booliiska Fardoolayda Boqortooyada Kanada (RCMP)

Booliska Kanada inta badani imika waxay ku dhaqmaan fikradda ah iskaashiga bulshada. Iskaashiga bulshada macneedu waa saraakiisha boolisku inay la shaqeeyaan bulshada xaafad kasta si looga hortago dhagarta loona kordhiyo ammaanka.

Marka booliis ku joojiyo, ku baadho, ku xidhaan ama ku hayaan, waxay raacayaan sharciyo adag. Saraakiisha booliisku waa inay kuu sheegaan:

- Sababta ay kuu hayaan
- Waa inay kuu sheegaan waxaad xaq u leedahay oo dhan.
- Waana inay hubiyaan inad fahamtay.

Hadii lagu xidho ama dambi lagugu eedeeyo, xaq waxaad u leedahay inaad hesho gar yaqaan. Waxaad xaq u leeday inaad doorato garyaqaankaaga. Waxaadna xaq u leeday inaad la talin sharci ku hesho afkaaga hooyo.

Helitaanka Garyaqaanka

Waa muhiim inaad hesho garyaqaan arrintaada ku habboon. Hoos waxa ku qoran dhawr siyaabood oo ad helitaanka u bilaabi karto:

- Wayddii saaxiibadaa, dad kula shaqeeya, iyo ehelkaaga haddii ay garanayaan garyaqaan ay kugula talinayaan.
- Wayddii shaqaalaha dejinta ama mid ka mid ah ururrada adeegga bulshada inay ra'yi kaa siiyaan.
- Ka eeg buugga tilifoonada ee huruudda ah (yellow pages) cinwaanka "lawyer" (garyaqaan)
- La xiriir adeegyada garyaqaannada dadka u dira ee ay maamulaan Law Society of Upper Canada (ururka Sharciga Kanada)

Adeegga Garyaqaanka Dadka u Dira (Lawyer Referral Service - LRS)

Adeegga garyaqaanka dadka u dira (LRS) waxay ku siin karaan tilifoon nambarka garyaqaan xaafaddada u dhaw oo tababarkiisu yahay mid ku habboon arrintaada. Waxaad kaloo wayddiisan karta LRS inay hubiyaan garyaqaanka ay kuu dirayaan inu noqdo mid ku hadla afkaaga hooyo.

Adeegga u diridda garyaqaanka

1-800-268-8326
416-947-3330 (in GTA)

Waad la hadli kartaa garyaqaanka LRS adoo la tashanaaya waqti aan ka badnayn (30) daqiiqo. Waadna go'aansan kartaa in aanad u kiraysan garyaqaankan inuu noqdo garyaqaankaaga, laakiin ma wayddiin kartid xafiiska LRS inay garyaqaan kale kuugu raadiyaan isla dhibaatadan.

Rugaha Gargaarka Sharciga

Waxad caawimo ka heli karta rugaha gargaarka sharciga. Rugahaa waxa jooga garyaqaanno iyo shaqaale bulshada u adeega oo ku caawin kara. Caadiyan, waa inaad ku nooshahay agagaarka rugta gargaarka sharciga si wax laguugu qabto. Waana in aanad awoodi karin inad iska bixiso kharashka garyaqaanka.

Rugaha gargaarka sharcigu waxay cawimaad ka bixiyaan sharciga qaybo ka mid ah. Qyabahaasna waxa ka mid ah:

- Khilaafka qofka guriga leh iyo kan kiraystay dhexmara.
- Magdhowga shaqaalaha.
- Caymiska shaqaalaha
- Gargaarka la siito saboolka
- Hawlgabka Kanada.
- Qaxootiga iyo socdaalka.
- Xeerka shaqaalaha.
- Iyo xuquuqda aadamaha.

Rugahan badanaa uma fidiso adeegyo wixii ku saabsan dhagarta iyo xeerka qoyska. Adeegyadani haddad rabto waxad u baahanaysaa, garyaqaan gaar ah iyo warqad ballan qaad inay rugta gargaarku kharashka bixinayso.

Uma baahnid warqad ballan qaad si aad caawimo ugaga hesho rugta gargaarka sharciga. **www.settlement.org/FD/25**

BULSHADA IYO MADDADAALADA

DHEXGALKA BULSHADA

Waxaad wakhti badan u huri doontaa inaad raadiso meel aad ku noolaato, inad barato ama kordhiso ingiriisiga iyo shaqo raadin. Laakiin waxaad si dhaqso ah ula qabsan doontaa bulshadaada cusub ee Ontaariyo haddii aad ka qayb qaadato maddadaalada iyo dhexgalka bulshada. Waxa kale oo ad la kulmi doontaa dad cusub oo aad la samayn kartaa xiriirro si ay kaaga caawiyaan shaqo raadinta.

Magaalo kasta oo ka mid ah Ontaariyo waxay leedahay barnaamijyo bulsho iyo maddadaalo iyo meeshi iyo qalab ad isticmaali karto. Inta badan, sticmaalku waa lacag la'aan ama waa qiime aad u yar.

Xiliga xagaaga, waalidiintu waxay carruurtooda la raadiyaan garoomo lagu ciyaaro iyo xarakaad ay ku maaweeloodaan. Barnaamijyadaas waxa lagu magacaabaa 'day camps, summer camps' ama 'summer programs' oo u dhigma 'golayaal maalin jog ah', 'golayaasha xagaaga ama barnaamijka xagaaga'. Dhammaantoodna waa meelo carruurta la geeyo si loo maaweeliyo waxna ka korodhsadaan. Sida badanna macluumaadka meelahaa waxad ka helaysaa xarumaha beelaha.

Waxad ogaata barnaamijyada adiga iyo qoyskaagu ad heli kartaan. Da'a walba barnaamijyo loogu tala galaybaa jira waxana ka mida fayo dhawr, farshaxan iyo xirfad gacmeed iyo kooxo hiwaayadeed. Barnaamijyo kala duwan baa jira xilli kasta oo sannadka ah. Tusale ahaan, xagaaga waxad helaysaa garoonka baraf-ku-cararka, jilaalkana waxad helaysa galka dabbaasha.

Waxad tagtaa xarunta macluumaadka bulshada ama ururka dejinta si ad u ogaato barnaamijydaa. Waxa kale oo ad la xiriiri karta dawaladda hoose ee degmadaada waaxda beeraha raaxda iyo mija baxsiga.

MAKTABADAHA

Maktabaduhu waa goobo dadwayne oo beeshaada ku yaalla. Maktabaduhu da'a walba waxbay u hayaan. Si ad buug u amaahato ama ad u isticmaasho Kombiyuutarka waa inad qaadata warqadda maktabadaha. Si ad u hesho warqadda maktabadaha waa inad keentaa warqad aqoonsi (sida oggolaasha baabuur wadidda ama warqadda degganaashaha) iyo wax caddaynayaa cinwaanka ad deggan tahay (sida biilka tilifoonka). Maktabaddu waxay u baahan tahay caddayn qofka ad tahay iyo cinwaanka ad deggan tahay. Dadka beesha deggani lacag la'aan bay ku helaan warqadda maktabadda.

Waa kuwan adeegyada iyo barnaamijyada ad ka heli karto maktabadda:

- Gargaarka layliga guriga si carruurta looga caawiyo waxbarashada
- Wakhti carruurta loo sheekeeyo iyo qalab ay ku ciyaaraan
- Fasallo iyo ilaha shaqa-raadiska iyo qorshaynta meheradda
- Barnaamijyada barashada akhriska iyo qoraalka ee dadka waawayn oo ay joogaan barayaal kuu dhigaya akhriska iyo qorista ama kaa caawinaya horumarinta xirfadda akhriska
- Ilaha laga helo barashada Ingriisiga Luqad Labaadda ah (ESL)
- Qoraayada magaalada/dalka oo ka akhriya buugtooda iyo hal-abuurrada farshaxanka magaalada oo carwooyin soo bandhiga
- Khudbado ama fasallo lagaga hadlo mawduucyada ay ka mid yihiin caafimaadka iyo dhaqaalaha qofnimo

Kombiyuutarradu qayb muhiim ah ayay ka yihiin sida maktabaduhu u shaqeeyaan. Maktabado badan baa leh kombiyuutarro iyo madbacado ad u isticmaali karto qoraalka, inad eegto

shaqooyinka la soo dhejiyo ama inad gasho shabakadda.

MAAWEELAYSI

Bulshooyinka Ontaariyo badankoodu waxay bilaash ama qiimo jaban ku hayaan amuuro, dabbaaldegyo, beero maddadaalo, farxshanno iyo hawlgallo dhaqan. Sannadka oo dhan waxa jira xilli loo dabbaaldego farshaxanka iyo dhaqanka. Qaar waxay ku gooni yihiin nooc farshaxan sida muusigga, ama farshaxanka qolo beesha ka mid oo dhan, sida Shiinaha Kanada. Dabbaaldegyada dhaqanka iyo farshaxanka Ontariyo waxay ka dhacaan dibadda xilliga jiilaalka waana bilaash. Waxa jira dabbaaldegyo maadays, jaaz, qorayaal iyo filimmo.

Bulshooyinka badankoodu waxay leeyihiin matxafyo, qolal farshaxan, goobo taariikhi ah iyo meelo kale iyo amuuro xiisa leh. Qolalka farshaxanka iyo matxafyadu waxay leeyihiin asbuuciba mar bilaash lagu galo ama qiimo jaban. Inta badanna carruurta iyo dadka 65 jir ka wayn qiimuhu waa u raaqiis.

Sannadka Cusub ee Shiinaha, Dabbaaldegga Qabka (Pride Parade) – waa dabbaaldeg ay sannadkiiba mar qabtaan khaniisiintu – Karibaanaha Toronto, Winterluudka Ottawa waxay ka mid yihiin tusaalooyin yar oo amuuraha xusidda mudan iyo dabbaaldegyada Ontaariyo. Kuwaas badankooda, oo ay ku jirto Maalinta Kanada ee 1da Luuliyo, waa dabbaaldegyo dadwayne oo ka kooban jid mar, qaraxinta baaruudda midabbada leh iyo muusig.

Waxad macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan maaweelada iyo siyaabo xiisa leh oo ad bulshadaada uga qayb qaadataba ka eegtaa qaybta “Dabbaaldeg” (Celebrate) ee ku taalla Settlement.Org - **www.settlement.org/FD/15**.

MACLUUMAADKA MACAAMIISHA

SARRIFKA LACAGTA

Waa fikrad wanaagsan in la haysto lacagta kanada inta aanad Ontaariyo iman. Waxa suurowda inad beddel wanaagsan kaga hesho dalka ad ka imanayso.

Garoonka Dayuuradaha ee Caalamiga ee Toronto markaad timaaddo, waxad lacagta ka beddelan karta daaqadaha sarrifka inta u dhaxaysa 5:00 aroornimo ilaa 11:00 habeenimo toddobada cisho ee asbuucaba. Habse ahaatee, sarrif ka wanaagsan baad ka helaysaa magaalada.

Waxa kaloo ad adeegga sarrif ka helaysaa bangiyada, rugaha safarka iyo faras magaalaha magaalooyinka badankooda. Hudheeladu way sarrifi karaan lacag kooban, laakiin heerka sarrifku inu wanaagsanaado lagama yaabo. Sida badan, baangiyadu waa meelaha ugu wanaagsan ee lacagta laga sarrifto.

ISTIMAALKA TILIFOONKA

Tilifoonka guriga sida loo soo xiro

Shirkadda tilifoonada ee Bell waxay kuu fidinanysaa adeegga tilifoonka gurigaaga. Si ad u dalbato, waa inad wacdaa 310-BELL (310-2355) ama tagta dukaamada Bell midkood oo ad ka dalbato adeeg tilifoon.

Qaxootiga cusub waxa suurowda in la wayddiiyo lacag rahaamad ama deebaaji ah si adeegga tilifoonka loogu rakibo. Lacagtaana waxa laguu soo celin doonaa lix bilood ka dib. Bell waxa kale oo ay soo dallacdaa kharashka xiridda tilifoonka marka ugu horraysa ee guriga la galinayo. Macluumaad dheerad ah waxad ka helaysaa shabakaadda Bell – **www.settlement.org/FD/23**

Markay Bell oggolaato in lagu siiyo adeegga tilifoonka, ballan bay kuu qaban doonaan si ay guriga u yimaaddaan. Waa inad guirga joogta marka ballantaa la gaaro si farsamayaqaanka tilifoonku u rakibo adeegga. Tilifoonada guduhu waa bilaash, kuwa meesha fog ad wacdaana waa lacag dheerad ah.

Tilifoonada gacanta

Kanada tilifoonka gacantu caan buu ka yahay waxana jira qorshayaal badan oo kala doorashadoodu ay murugsan tahay. Inta aanad iman ka hor, waxad shabakadda ka ogaan karta noocyada kala duwn ee tilifoonka gacanta. Waa tan shabakad faa'iido badan lihi: **www.settlement.org/FD/19**.

Waxa suurowda in adeegyadaasi ay ka duwan yihiin kuwa dalka ad ka imanayso. Ogow sida ay u kala duwan yihiin qiimaha, qorshaha iyo nooca tilifoonka ad heli karto inta aanad heshiis la gelin shirkadaha tilifoonka gacanta midkood.

Tilifoonada dadwaynaha u dhexeeya

Tilifoonada dadwaynaha u dhexeeya waxad ka helaysaa garoonka diyaaradaha, gegida basaska iyo tareennada, makhaayadaha, dukaannada, rugaha dukaamaysiga iyo isgoysyada waddooyinka qaarkood. Tilifoonadan waxa kale oo loo yaqaanna "tilifoonka lacagta lagu rido".

Diridda tilifoonka gudah

Tilifoonka ad guirgaaga ka dirto ee ad u dirto meel magaalada gudaheeda ahi waa bilaash, laakiin haddii tilifoon laga diro tilifoonka dadwaynaha oo loo diro magaalada gudaheeda waa 50 santi. Tilifoonada dadwaynaha qaarbaa imika ka qaadaya 35 santi. Meel fog haddaad u dirtana way ka sii lacag badan tahay.

Haddaad magaalada gudaheeda wacayso adigoo isticmaalaya tilifoonka dadwaynaha:

Kor u qaad, 25 santi ku rid deedna nambarka ad doonayso garaac.

Tilifoonada badankoodu way qaataan 5, 10, 25 santi iyo $1doolar oo qaddaadiic ah. Haddaad $1 doolar oo iswata ku riddo waxa laga yaaba in aan sarrif kaaga soo noqon.

Meelaha qaarkood waxad u baahan doonta inad horta wacdo furaha meeshaas. Tusaale ahaan, Toronto iyo agagaarkeeda, waa inad garaacdaa 416 ama 647 ama 905 inta aanad garaacin nambarka tilifoonka – tirada nambarrada tilifoonada guduhu waxay ka kooban yihiin 10 nambar.

Diridda tilifoonada dibadda

Tilifoonka gurigaaga waxad ku dari karta qorshe wicidda dibadda ah ama waxad isticmaali kartaa kaarka la qaddimo. Kaarka la qaddimaa aad bay uga raqiisan yihiin inad wicitaanka meesha fog ka dirto kan gurigaaga. Waxa hubaal ah in kaarka la qaddimaa ka jaban yahay markaad tilifoonka dadwaynaha u dhexeeya ka wacdo meel fog adigoo isticmaalaya lacag cad ama kaarka daynta.

Markaad gadato kaarka la qaddimo ee tilifoonka waxad ogaan karta inu siinayo daqiiqado wanaagsan. Meesha ad ka iibsatay waxad wayddiisa inay ku tusaan shax is barbar dhigta kaarar badan iyo daqiiqadahooda. Isku eeg dhawr kaar oo kala duwani inta daqiiqo ee ay ku siinayaan dalka ad wacayso.

Waxa kale oo ad diri kartaa “wicid xawilaad ah” (Collect Call). Wicidda xawilaadda ah waxa lacagta tilifoonka bixinaya qofka ad wacayso. Si ad wicid xawilaad ah u samayso, garac “0”, ka dibna furaha iyo nambarka tilifoonka deedna raac tilmaanta cajaladda.

Nambarada diristoodu bilaashka ka tahay

Nambarrada meelaha fog qaarkoodbaa la yiraa nambarro bilaash ah. Haddaad nambarradaa wacdo lacag ma aha. Waxay ka bilawdaan nambarradaasi 1-800, 1-866, 1-877 ama 1-888. Xafiisyada dawladda, ururrada bulshad iyo ganacsiyo badani waxay leeyihiin nambarro bilaash ah.

Nambarrada 1-900 iyo 1-976 diristoodu bilaash ma aha. Lacag baad bixinaysa daqiiqad kasta oo ad ku hadasho sida badanna aad bay qaali u yihiin.

Isticmaalka buugga tilifoonada

Buugga tilifoonnada ama diwaanka tilifoonada waxad ka heli karta goobta tilifoonka dadwaynaha u dhexeeya.

Buugga tilifoonada ee Waraaqaha Caddi (White pages telephone book) wuxu leeyahay afar qaybood:

Nambarrada gurmadka deg dega ah (iyo hagaha macmiisha)

Qaybtan waxa ku qoran nambarrada la waco marka qalalaase dhaco sida booliska. Waxa kaloo qaybtani kuu sheegaysaa sida tilifoonka loo isticmaalo.

Warqadaha Cad

Qaybtan waxa ku qoran magacyada dadka iyo ganacsiyada magaalada. Waxa ku yaalla tilifoonkooda iyo cinwaankooda jidka. Dadka waxa ku qoran magacooda ugu dambeeya (magaca awowga). Dadka iyo ganacsiguba waxay u taxan yihiin sida xarfaha magacoodu u kala horreeyan. Magaalooyinka waawayn qarkood, sida Toronto oo kale, warqadaha caddi laba qaybood bay kala yihiin – tilifoonada dadka oo qaybta hore ah iyo tilifoonada ganacsiyada oo qaybta dambe ah.

Warqadaha Buluugga ah

Qaybtani waxay ku daabacan tahay warqad buluug ah. Waxa ku qoran xafiisyada dawladda iyo tilifoonnada ad kala xiriiri karto. Waxay kaloo ay taxda adeegga dawladda oo u kala baxsan nooca

adeegga. Tusaale ahaan, si ad u hesho Wasaaradda Caafimaadka, warqadaha buluugga ha waxad ka eegtaa "Caafimaad".

Buugga Huruudda ah ee tilifoonada

Buugganii wuxu ku daabacan yahay warqado huruud ah. Waxa ku taxan gancsiyada oo kala baxsan noocyadooda. Tusaale ahaan, haddaad biidsa dalbanayso, waxad Buugga Huruudda ah ka eegtaa "Pizza" deedna ka dooro dukaanka kuugu dhaw. Magaalooyinka waawayn ee Toronto oo kale, buugga huruudda ahi waa mid gooni ah oo buugtii hore aan ku jirn.

Magaalooyinka waawayn, Buugga warqadaha cad iyo kuwa buluugga ha iyo buugga huruudda ha waxa aalaaba lagu kala daabaca laba diiwan tilifoon oo kala duwan. Magaalooyinka yarse, dhammaantood hal diiwaan baa lagu daabici kara. Nambarrada gurmadka degdegga ah iyo sida diiwaanka tilifoonnada loo isticmaalaba waxad ka helaysa qaybta hore diiwaanka tilifoonada.

DIRTAANKA IYO HELITAANKA WARQADAHA

Diritaanka warqadda iyo buqshadda

Haddaad dirayso warqad ama buqshad waa inad bixisaa kharashka dirridda. Kharashka diriddu waa lacagta ad bixinays markaad warqad ama buqshad dirto.

Adeegga boostada waxa laga helaa xafiisyada boostada iyo rugta boosaha ee ku dhex yaalla dukaamada qaarkood sida "Shoppers Drug Mart". Si ad hesho xafiiska ama rugta boostada, waa inad dariishadaha dukaanada ka fiirisaa astaanta Boostada Kanada (Canada Post). Waxad isticmaali karta Diiwaanka tilifoonka si ad u hesho xafiiska boostada ee kuugu dhaw.

Qimaha warqadda ama buqshadda lagu diraa wuxu ku xidhan yahay inta ay le'eg tahay iyo inta miisaankeedu yahay. Waxa kaloo qiimuhu ku xiran yahay meesha ad u dirayso iyo degdegta ad doonayso inay meesha ku tagto. Sid caadiga ah, inta warqadda ama buqshadu sii soconaysa markay badato, lacagtuna way badanaysaa.

Haddaad waddan kale buqshad u dirayso, waxad buuxinaysa foomka qaybta cashuurahu leeyihiin. Foomkaas waxad ka helaysa boosta. Foomku wuxu qeexaya waxa buqshadda ku jira. Waxa kaloo u qeexayaa buqshadda qiimaheeda iyo inta miisaankeedu yahay. Buuxinta foomkaas waxa kaa caawin kara shaqaalaha xafiiska boosta.

Helitaanka cinwaan wax laguugu soo diro

Markaad hesho meel ad ku noolaato, waxay waraaqaha iwm si toos ah laguugu soo diri karaa gurigaaga ama sanduuqa boosta. Inta aanad helin meel ad ku noolaato, saddex siyaabood oo kala duwaan bay wax kuugu iman karaan:

Qof saaxiib ah ama qaraaba ah wayddiiso inad isticmaali karto cinwaanka u leeyahay. U sheeg dadkana inay kuugu soo hagaajiyaan "Laga Helo – L/H" (C/0) magaca saaxiibkaa ama qaraabada.

Xafiiska boosta waxad wayddiisa adeegga boostada ee qofku wixi u yimaadda isagu soo donanayo. Adduunkoo dhan adeeggan waxa looga yaqaanna "poste restante" – boosta faro ka saarka ah. Adeegga qaadasha ama faro ka saarka ah waxa lagu haynayaa xafiiska boostada xaafadda ilaa qofku ka qaadanayo. Magaalooyinka waaywayn ee ay ku yaallaan dhawr xafiis oo waawayni, xafad kasta hal xafiisbaa u qaabbilsan inu hayo boosta faro ka saarka ah.

YOUR NAME
GD STN MAIN
TORONTO, ON M2R 5H2

Sanduuqa boosta ayaad ka kiraysanaysa xafiiska boostada ama dukaamada ka gancsada adeeggan. Sidaas baad ku helaysaa cinwaan ad dadka siiso oo ay wax kuugu soo diraan. Haddii laguu soo diro buqshad aan gali karin sanduuqa boosta, farriin bay boostadu kuu dhaafi doonta buqshaddana waxad u doonanaysaa makhalhayaha dukaanka.

GAADIIDKA

Kaxaynta gaadiidka

Haddaad Ontaariyo ku nooshahay oo ad u baahan tahay inad baabur kaxayso, waa inad haysataa oggolaashaha kaxaynta gaadiidka. Wasaaradda Gaadiidka (MTO) oo shabakadeeda internetku yahay, **www.settlement.org/FD/26** aya dhiibta oggolaashaha kaxaynta gaadiidka iyo oggolaashaha waddo marista gaadiidka. Macluumaad dheeraad ah waxad ka heli kartaa maqaalka "How can I get an Ontaariyo driver's license" – "sideen u heli karaa oggolaashaha kaxaynta gaadiidka ee Ontaariyo" – oo ku qoran bogga shabakadda - **www.settlement.org/FD/16**.

Waad isticmaali karta oggolaasha kaxaynta ee waddan kale ilaa 60 maalmood markaad Ontaariyo timaaddo ka dib. Wasaaradda Gaadiidka ee Ontaariyo waxad kala xiriirtaa tilifoonka **1-800-387-3445** si ad u ogaato macluumaadka ku saabsan oggolaasha iyo sharciyada waddida gaadiidka.

Baabuurkaaga waa inad ka diiwaan galisaa hay'adda ruqsaha gaadiidka ee gobolka Ontaariyo waana inad baabuurkaaga caymis galisaa. Waa sharci darro in la wado baabuur aan caymis ku jirin. Caymiska baabuurtu waa qaali, laakiin wuxu daryeelayaa adiga iyo wadayaasha kale haddii shil dhaco.

Haddii aanad baabuur lahayn, waxad ka ijaaran karta shirkadaha baabuurta kireeya maalin, asbuuc ama muddo ka dheer. Shirkadaha baabuurta kireeya badankoodu way ku siin karaan macluumaadka sharciga baabuur wadidda.

Shirkadaha baaburta kireeya waxay kaa qaadayaan lacag ku salaysan muddada ad baabuurka wadato iyo inta kiilo mitir ee ad waddo. Waxa kale oo ad iibsan doontaa caymiska shilka, gaaska ad ku socotana adigaa iska bixinaya.

Socsocdka – Gaadiidka dadwaynaha

Magaala kasta oo Ontaariyo ku taalla waxay leedahay nidaam gaadiid oo basas iyo tareenno ka kooban. Toronto waxa kaloo ay leedahay tareenno gaadiid dadwayne ah oo dhulka hoostiisa mara loona yaqaan "Subway". Magaalooyinka badankoodu waxay bilaash ku bixiyaan khariidadda gaadiidka dadwaynaha.

Ururka Gaadiidka Dadwaynaha Toronto (Toronto Transit Commission – TTC) waxay macluumaad ku bixiyaan in ka badan 20 af waxanad kala hadli karta **416-393-4636**. Waxa kaloo ad macluumaad ka heli karta shabakadda TTCda **www.settlement.org/FD/17**.

Si ad u raacdo gaadiidka dadwaynaha waxad bixin karta lacag caddaan ah markaad meel tagaysaba. Waa inad haysataa sarrif go'an maxaa yeelay dareewalku kuma siin karo baaqi. Haddaad gaadiidka dadwaynaha aad u isticmaasho, waxad iibsan karta tigidho xaashi ah, tigidho bir ah (token) ama tigidh maalin-ku-raaca ama bil-ku-raac ah. Way kharash badan tahay inad lacag bixiso mar kasta oo ad meel tegayso. Tigidhada nooc kasta waxad ka iibsan kartaa goobaha ay joogsadaan basaska, tareennada iyo dukaamada qaarkood.

Mararka qaarkood waxad u baahan tahay inad kala beddesho basaska ama tareennada si ad u gaadho meesha ad ku socoto. Hadday tani dhacdo waxad u baahan tahay tigidh beddel ah. Tigidhka beddelku waa warqad dareewalka u sheegaysa in aan mar labaad lacag lagaa qaadin. Baska ama tareenka jidka ugu horreeya ee socdaalkaaga markaad fusho dareewalka wayddiiso inu ku siiyo beddel.

U kala safarka magaalooyinka

Magaalooyinka iyo tuulooyinka Ontaariyo badankoodu waxay leeyihiin xero ay ka baxaan basaska iyo tareennadu. Xerada waxad ka ogaan kartaa baska iyo tareenka halka ay tagaan, maalmaha iyo xilliyada ay baxaan iyo inta lagu raaco. Haddaad diyaarad raacayso waxad wici kartaa shirkadaha safarka oo ad wayddiin karto xilliga iyo qiimaha dayuuradaha magaalooyinka u kala goosha.

Tagsi

Haddii aanu jirin gaadid dadwayne ama ad u baahan tahay inad si dhaqso ah meel u gaadho, waxad ijaaran karta tagsi. Waxad wacaysaa shirkadaha tagaasida midkood oo ad ka codsanayso inay cinwaanka ad siiso tagsi u soo diraan. Xitaa waxad wici karta markaad tegayso wakhti aad uga horreeya waxanad u sheegi karta inay kuu yimaaddan markaad baxayso oo wakhtigeeda siisay.

Jidka intaad istaagtana tagsi maran oon cid wadin ayaad gacantaad u taagi kartaa siiba waddooyinka hawsha badan ee faras magaalaha. Sida jidka tagsi looga helaa ma fududa magaala kasta oo ay tahayba. Waxa kuu joogsanaya oo kaliya baabuurta dusha ku sita astaanta tagsi ee iftiinta.

Qiimaaha tagsigu wuxu ka soo baxa socod-cabbire dareewalka agtiisa ku yaalla. Markaad fusho tagsiga cabbirku wuxu ku tusayaa qiimaha socod bilawga ah. Inta aanad fuulin, wayddii dareewalka inta safarku kugu kici doono.

Lugaynta iyo sharciyada wadada

Calaamadaha loogu tala galay dadka lugaynaya ayaa ku yaalla isgoys kasta oo leh nalka baaburta kala hora. Calaamadahaasi waxay kuu sheegayaan marka ay ammaan tahay inad jidka

goyso. Isgoysyada saxmadda badan leh waxa ku yaalla meel laga tallaabo. Meel jidka laga gooyo oo la yidhaa "Crosswalk" ayaa ku yaalla jidadka aan lahayn nalal wax kala hora.

LACAGTA IYO MAALIYADDA

Macaamilka Baanka

Furashada Xisaab Bangi

Waa fikrad wanaagsan inad sida ugu dhaqso badan u barato sidaad u kala dooran lahayd bangiyada. Horta go'aan ka gaadh baahidaada bangi inta aanad xisaab bangi furan deedna is barbar dhig adeegyada bangiyada kala duwan

Bangiga uu doonaba ha noqdee xisaab ad bangi ka furata waa meel ammaan ah oo ad lacagtaada ku haysan karto waxayna kuu fududaynasaa inad lacagtaada hagaag u maarayso. Xisaabta bangigu waxa kaloo ay kaa caawinaysaa inad hesho taarikh dayn qaadasho oo ad u baahan doonto haddii ad rabto inad dayn qaadato ama ad kaarka daynta qaadato.

Waxa jira hay'ado lacageed oo badan oa ad ka furan karto xisaab dhigaal ah ama xisaab socota (checking account) oo ad jeegag u qori karto. Bangiyada, shirkadah ammaanda iyo maamulka hantida (trust companies) iyo iskaashatooyinka daynta (credit unions) macluulaad lacag la'aan ah ayay kaa siinayaan adeegyadooda oo ay ku jiraan kaararka daynta iyo kuwa xisaab socota lagu dallaco (kaar ad xisaabtaada bangiga lacag kala bixi karto adigoo an bangiga tegin). Bangi kasta intood gasho ayaad wayddiin karta adeegyadooda.

Markaad xisaab ka furanayso bangi ama shirkad ammaano ama iskaashato dayneed waxad u baahan tahay laba warqadood oo aqoonsi ah. Sida badanna labada aqoonsi midkood waa in sawirkaagu ku yaalla. Markaad xisaabta bangiga furanayso uma baahnid inad lacag ku furto ama ku shubto. Inad shaqaysana u baahna xisaab furashadu.

Waa fekrad fiican in la barto kala doorashada bangiyada sida ugu dhaqsaha badan ee aad u awoodo. Go'aanso waxa baahida kaydintaadu tahay, barbar dhig adeegyada ay bangiyo badani fidiyaan ka hore inta aanad furan xisaab bangi.

ISTICMAALIDA MASHIINKA BANGIGA

Markaad xisaab bangi furato, waxa lagu siin doonaa kaar la yiraahdo kaarka bangiga, loona yaqaan kaarka lacag la bixidda (debit card). Kaarkani wuxu kuu saamaxayaa inad lacagtaada kala baxdo mishiin bangi adigoo an bangiga tegin. Mishiinka bangiga waxad u isticmaali karta inad xisaabtaada lacag ku shubto, inad lacag kala baxdo iyo inad biilal iska bixiso. Mishiinadan waxa lagu magacaaba Mishiinada Bangiga ee Iswada (Automated Banking Machines – ABM) ama Mishiinada Darka Bangiga ee Iswada (Automated Teller Machines – ATM)

Bangigu wuxu ku wayddiin doona inad doorato Nambar Aqoonsi Qofeed (Personal Identification Number – PIN) oo kaarka ku xilran. Nambarkaasi waxa loogu tala galay ammaanka kaarkaaga si aanay cid kale u isticmaalin kaarka. Cid kale ha u sheegin Nambarka Aqoonsiga ee kaarkaaga. Marka kasta oo kaarka bangiga isticmaasho waa gelisa nambarkaas.

Haddaad isticmaasho Mashiinka Bangiga ee Iswada oo bangi xisaabtu kaaga furan tahay mooyaane mid kale leeyahay, waxa lagugu dallacayaa lacag. Markaad isticmaasho Mashiinkaas kuwa ay leeyihiin dad gaar ahi, lacagtu lagugu dallacayaa way ka sii badan tahay. Mashiinnadan waxay ku yaallaan dukaannada, makhaayadaha iyo meelo kale. Mashiinadaas gaarka loo leeyahay lacag badan bay kugu soo dallacayaan si ad lacagtaada ugala baxdo. Waxa ka raqiisan inad isticimaasho mashiinada bangiyada iyo kuwa iskaashatooyinka daynta.

Kaararka daynta iyo dhisidda oggolaasha daynta.

Xitaa haddaad shirkadaha caalamiga ah ee daynta sida VISA iyo MasterCard ad ku leedahay sannado badan oo taarikh dayn qaadasho ah, haddana kaararka noocaas ah kanada ka heli maysid. Arrintaasina dadka badankiisa way ka yaabisaa.

Hadday suuragal tahay, Kaararkaas ha googayn inta aanad Kanada iman. Waxa suuragal ah in aanad halkan si dhaqso ah uga helin kaarka daynta. Hadday taasi dhacdo waxad u baahnaan doontaa kaararka ad imika haysato.

Si ad u dhisto taarikhaada dayn bixinta ad ku yeelanayso Kanada, waxad dalbataa kaarka daynta. La hadal shaqaalaha laanta bangiga xaafaddaada ku taalla. Waxa suurowda in bangigaagu ku siiyo kaarka daynta oo ad ku qaadan karto dayn aan badnayn ama waxay ku siin karaan Kaarka Daynta ee Rahman.

Si ad u hesho kaar rahman, cidda kaarka ku siinaysa ayaad dhigaysaa lacag. Rahaamadda lagaa dhigayaana waxay ku xiran tahay heerka daynta ad dalbato. Haddii dayntaas ad qaadatay ad bixiso bil walba lacagta lagugu soo dallaco oo ad dhisto taarikh daymeed wanaagsan, waxa laguu soo celin doonaa lacagtii rahaamadda ahayd oo dulsaar leh. Kaddibna waxad heli doonta kaar daymeed oo caadi ah.

Sicirrada iyo cansuuraha

Ontaariyo markaad wax ka iibsanayso, waxad bixin doontaa qiimaha shayga ku yaalla oo lagu daray cashuur. Dukaanada badankooda qiimaha laguma gorgortamo. Waxase suuragal ah inad qiimaha ka gorgortami karto suuqyada ama dukaamada qabaliga ah qaarkood.

Markaad shay iibsato ee ad lacagta bixiso, cashuurta waxa lagu dara wadarta qiimaha. Inta badan, wadarta cashuurtu 13% bay ka tahay qiimaha. 13% kaas waxa ku jira 5% ah Cashuurta Alaabta iyo Adeegyada ee dawladda federaalka ah (GST) iyo 8% ah Cashuurta libka Gobolka (PST).

Cahuurta GST da wax kasta oo la iibsado lagama bixiyo, sida raashinka asaasiga ha iyo dawooyinka takhtarku qoro. Haddaad khamri ka dalbato makhaayad, waxa cashuurahaas lagu darayaa 10% cashuurta khamriga ah.

Cashuur Celinta

Cashuurta Alaabta iyo Adeegyada (GST Credit).

GST du waa cashuurta ad ka bixiso badanka alaabta iyo adeegyada Kanada lagu iibiyo. Celinta GST/HST du waa lacag aan cashuur lahayn oo saddexdii biloodba mar la siiyo dadka iyo qoysaska dhakhligoodu dhex dhexaad yahay ama hooseeyo.
Barnaamijkaasi wuxu dadkaas u celiyaa qayb ama dhammaan cashuurta GST/HST ee ay bixiyeen.

Si ad celintaa u hesho waa inad deggan tahay Canada, jirtana 19 sannadood ama ad ka wayn tahay. Markaad hesho Nambarka Caymiska Bulshada sida ugu dhaqso badan u dalbo cahuur celinta GSTda. Si ad u hesho cashuur celinta GST/HST waa inad xerayso xisaabinta Cashuurta Dakhliga iyo Soo Celinta Gargaarka sannad walba.
Macluumaad dheeraad ah waxad ka heli karta haddaad wacdo tilifoonka Macluumaadka GSTda ee ah **1-800-959-1953**.

Soo Celinta Cahsuurta Gargaarka Korinta Carruurta (Canada Child Tax Benefit – CCTB)

Hadday carruurtaadu ka yar yihiin 18 jir, waxad u qalmi karta inad hesho Soo Celinta Cashuurta Gargaarka Korinta Carruurta (CCTB). Cahuur Celiskani waa lacag ay bishiiba mar bixiso dawladda Kanada oo gacan ka gaysta kharashka korinta carruurta.

Foomka dalabka waxad ka heli kartaa shabakadda Wasaaradda Cashuuraha iyo maaliyadda ee Kanada oo ah: **www.settlement.org/FD/17**. Waa inad cashuur celiskan dalbata isla markaad timaaddo ee gurigaaga cusub degto.

Inta lagu siin doono iyagaa go'aan ka gaari doona iyadoo ay ku xiran tahay tirada carruurtaada, da'dooda, gobolka ad ku nooshahay, iyo dhakhliga qoyskaaga ka soo galay adduunka meeshay doontaba ahaatee saddexdii sano ee u dambaysay.

TALLAABOOYINKA XIGA

Waxan rajaynaynaa in hagagani kaa gargaaray jawaabaha su'aalo badan oo ad ka qabtay sidii ad nolol cusub uga bilaabi lahayd Ontaariyo. Sidaad arki karto, hawlo badan baa u baahan in la qabto waxana laga yaabaa inad garan waydo halkii ad ka bilaabi lahayd.

Taxa hawsha ee Imaatinka (Ku soo Dhawoowda) Kanada

Bogga 2aad ee hagahan oo ay ku taallo taxa hawsha ee Ku soo Dhawoow Kanada waa meel wanaagsan oo ku habboon in laga bilaabo hawsha. Calaamadee qodobbada aan ku khusaynin ama kuwa ad hore u samayasay. Haguhu wuxu leeyahay macluumaad kuu sheegayaa sidaad u dhammayn lahayd tallaabooyinka kuu dhiman. Haddaad gargaar u baahatana waxa jira ururro badan oo ku faraxsan inay su'aalaha kaaga jawaabaan, sida badanna, ay bilaash kaaga caawiyaan inad buuxiso foomamka lagama maarmaanka ah. Guji dabarka qayb kasta ee shabakada **www.settlment.org** si ad u hesho adeegyada degaankaaga.

SETTLEMENT.ORG

Settlement.Org waa meel muhim ah oo ad ka heli karto macluumaad dheeraad ah, adeegyada, xaddilaadda foomamka iyo la xiriirka dadka kale ee ku cusub Ontaariyo. Marka dambe ee ad ku jirto shabakadda waxad gashaa **www.settlement.org**.

WAXAN KUU RAJAYNAYNAA IN ONTAARIYO GUUL KALA KULANTO!